MAJALADDA MARAG

Cadadka Sagaalaad | Dec 2025

# SOOMAALIYA 25 SANO KA DIB: DHISMAHA DOWLADNIMADA SADDEXAAD, DOORASHO IYO DASTUUR LAGU MURANSAN YAHAY

## Maxaa Xal u ah 2026 iyo Ka Dib? Ma Heshiis Doorasho keliya Mise Heshiis Bulsho

Axmed Siciid Nuur

Bogga: 29




Xigashada Sawirka: BBC Somali

# Qorayaasha Majaladda




**Cabdiraxmaan Caynte**
Doorasho aan heshiis lagu ahayn dagaal bay dhalisaa — 4



**Cabdiraxmaan Cabdirasaaq**
Musuqmaasuqa: Kansarka Haliska ku ah Dadnimada iyo Dowladnimada Soomaaliya — 7




**Axmed Abshir Jaamac**
Hal doolar oo Horseeday Horumar Waara: Sheekada Hindise Garoowe ka curtay Puntland ku faafay — 11



**Cali Xaaji Warsame**
MAXAA HORTAAGAN BAAHINTA ADEEGYADA BULSHADA EE DOWLADDA SOOMAALIYA — 17



**Saki Rabiica**
MIDNIMO MISE GOONI-GOOSAD? Jahawareerka Aragtiyeed ee Indheergaradka Puntland — 23




**Bashiir Suuleey**
Hoos u Dhaca Ganacsiga Puntland: Sababaha, Saameynta iyo Talooyin Wax-ku-ool ah — 26



**Axmed Siciid Nuur**
Soomaaliya 25 Sano Ka Dib: Dhismaha Dowladnimada Saddexaad, Doorasho iyo Dastuur lagu muransan yahay — 29



**Cabdiraxmaan Maxamuud**
DOORKA CILMI-BAARISTA EE WAXBARASHADA SARE EE SOOMAALIYA — 38



**Dr. Maxamed Cali Faarax**
Qorshayaasha lagu Burburiyo Bulshooyinka: Xeeladaha la adeegsado iyo sida looga hor-tagi karo — 42



**Cabdikaadir Cali Warsame**
Waqafka iyo Horumarinta Bulshada Soomaaliyeed — 46



**Dr. Cabdifitaax Nuur Qodax**
Soomaaliya: Xulufeysiyo siyaasadeed! Maxay daaranyihiin?! — 49

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno cadadka sagaalaad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Cadadkani waa kii ugu dambeeyay ee sanadka 2025, sannad ay majalladdu ku guulaysatay inay soo saarto sagaal cadad, isla markaana noqday sannadkii ugu horreeyay ee la aasaaso.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Akhristayaashu waxay cadadkan ka heli doonaan mowduucyo kala jaad ah, oo ay ka mid yihiin siyaasadda iyo khilaafaadyada taagan, arrimaha bulshada, musuqmaasuqa, ganacsiga, iyo cilmi-baarista.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# DOORASHO AAN HESHIIS LAGU AHEYN DAGAAL BAY DHALISAA



Cabdiraxmaan Caynte



**Xigashada Sawirka**: SNTV

Tan iyo markii jamhuuriyadda saddexaad ee Soomaaliya la dhisay 25 sano kahor, madaxweyne walba oo la doorto wuxuu isku dayay inuu muddo xileedkiisa dastuuriga ah wakhti dheeraad ah ku darsado. Qaar kamid ah lixdii madaxweyne ee dalka soo hoggaamiyey rubuc qarnigaas way ku guuleysteen iney muddo kororsi sharci darro ah sameysteen, iyagoo marmarsiiyo ka dhiganaya baahida loo qabo “qof iyo cod” oo ah yool siyaasadeed oo ku cad dastuurka kumeel gaark ah (KMG) ee Soomaaliya.

Isgoyskii ayaan maanta mar kale taagannahay. Muddo xileedka dastuuriga ah ee u haray madaxweynaha talada haya, Mudane Xasan Shiikh Maxamud, waa in ka yar shan bilood. Sida dastuuriga ah, waxay ahayd in dhammaadka 2025 iyo horraanta 2026 la soo doorto xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya. Iskaba daa taase, illaa iyo haatan saamileyda siyaasadda (dowladda federaalka ah, dowlad-goboleedyada iyo xoogagga mucaaradka ah) heshiis kuma ahan hannaanka doorashada heer federaal.

Taas beddelkeeda, Madaxweyne Xasan Shiikh wuu iska aqdaananayaa oo wuxuu iska wataa doorasho uu isagu xeerarkeeda iyo xeer beegtideeda sameystay. Wixii dalka xoog iyo xoolo yaallayna isagaa isku gaar yeelay. Waxaana u qorsheysan in, marka ay dhacdo “doorashada golaha deegaanka Banaadir”, inuu guddiga lagu muransan yahay ee doorashooyinka uu soo saaro jadwal doorasho oo madaxweynaha u xalaaleynaya muddo kororsi baalmarsan dastuurka KMG ee dalka. Taasina waa isla dhabbihii uu afar sano kahor qaaday Madaxweyne Maxamed Cabdulaahi Farmaajo, ugu dambeyntiina kusoo jabay.

## SHALAY IYO MAANTA ISKU EKAA!

Dhabbaha qardajeexa ah ee uu haatan isku maqiiqayo Madaxweyne Xasan Shiikh, waxaa horay ugu soo hungoobay Madaxweyne Farmaajo oo si dirqi ah ku ciriirsaday 15 bilood oo uu xukunka dalka ku heystay sifo aan sharci aheyn. Balse, muddadaas wuxuu soo dhadhamiyey dacar, oo waa tii ay si wadajir ah uga horyimaaddeen madaxda dowlad goboleedyadii oo isagu soo dhistay iyo ra’iisul wasaarihii uu soo magacaabay.

Sidoo kale, Madaxweyne Farmaajo waxaa si mug iyo miisaan leh uga horyimid mucaaradkii ku mideysnaa Madasha Musharrixiinta oo gacansaar xooggan ka heleyay dowlad-goboleedyada Jubbaland iyo Puntland. Mid kamid ah xiddigaha ugu firfircoon mucaaradkii dowladdii Farmaajo wuxuu ahaa Madaxweyne Xasan Shiikh.

Maanta, intii ay shalay wada socdeen ayaa sidii oo kale diyaar ugu ah iney sidii oo kale uga dhiidhiyaan damaca gurracan ee muddo kororsiga iyo boobka hantida qaranka. Booskii uu shalay ku jirayna waxaa soo galay Madaxweyne Farmaajo oo Muqdisho kusoo laabtay bishii November 2025.

Nin ajnabi ah oo kamid ah howlwadeennada Qaramada Midoobay, muddo dheerna kasoo shaqeeyay Soomaaliya, ayaa igu yiri hadal aad ii saameeyay: “Qofkii comma (miir-daboolan) galay bishii April 2022 ee haatan kasoo toosay, wuxuu is dhihi lahaa haba yaraatee wax iska beddelay Soomaaliya ma jiraan. Odayaashii is-hayay iyo aragtidii la isku hayayba waa sidoodii.”

Taasi macnaheedu wuxuu yahay in horweynta siyaasadda dalku aysan shalay waxba ka baran. Haddii mid kamid ah odayaasha mucaaradka uu ku guuleysto doorashada soo socota, inuu afar sano kaddib isla isgoyskaan soo istaago isagoo raadinaya muddo kororsi aan dastuuri ahayn lama biciidsan karo. Maxaa yeelay hab-dhaqanka samaysmay ayaa sidaas iska noqday.

## DOORASHO MISE BOOBID?

Dhaqdhaqaaqa uu haatan Madaxweyne Xasan Shiikh ka wado Gobolka Banaadir ee uu ugu yeero “doorasho” waa boob aan loo meel dayin. Xisbiga aan guddoomiyaha ka ahay ee Xaqsoor ayaa kamid ah dhowr xisbi siyaasadeed oo isku dayay in la saxo khaladaadka nuxurka ah ee ku jira xeerka doorashooyinka 2024 iyo midka axsaabta siyaasadeed. Wadahadal socday muddo saddex bilood ah ayaan la galnay guddi heer wasiir ah oo uu soo magacaabay Madaxweyne Xasan Shiikh. Waxaan u gudbinnay 13 qodob oo u baahan in laga turxaan bixiyo xeerarka doorashooyinka golayaasha deegaanka, si ay u noqdaan kuwa hufan oo lagu tartami karo.

Guddigii wasiirrada ee wada xaajoodka nagula jiray waxay markii hore muujiyeen dabacsanaan iyo garowsi ku saabsan turxaanta ku jirta xeerarka doorashada. Waxay ballan qaadeen in xukuumaddu ay 13-ka qodobba wax ka beddeli doonto. Nasiib darro, waxay ugu dambeyntii ka biyo diideen fulinta qodobkii ugu horreeyay ee ahaa in fatashaad farsamo (technical audit) lagu sameeyo hannaanka diiwaangalinta iyo kaar-bixinta codbixiyayaasha.

Sababta aan fatashaadda farsamo ee madaxa bannaan u dalbannay waxay ahayd inaan haynay xog lagu kalsoonaan karo oo muujineysa in dowladdu ka been sheegtay tirada dadka isdiiwaan galiyey, iyo in nidaamka kombiyuutarka ah ee loo isticmaalayo diiwaangelinta iyo kaar-bixinta, inuu yahay mid loo naqshadeeyay inuu saaro hal natiijo, taasoo ah guuleysiinta xisbiga JSP ee talada haya. Kolkii ay xukuumaddu diidday in fatashaad farsamo lagu sameeyo nidaamka ayay noo sii xaqiiqowday tuhunkii aan qabnay, waana sababta keentay inaan gabi ahaanba isaga baxno wadahadalkii aan kula jirnay xukuumadda.

Madaxweyne Xasan Shiikh, oo adeegsanaya xeerar iyo xeer-beegti uu isagu isla ekeysiiyey, waxaa u qorsheysan inuu dhammaadka bishan December Xamar ka qabto “doorasho gole deegaan” oo natiijadeeda lasii ogyahay. Waxaa aqlabiyad aad u weyn ku guuleysan doona xisbiga talada haya ee JSP, xoogaa yarna wuxuu u hambeyn doonaa dhowr xisbi oo ay bahwadaag yihiin.

## CAWAAQIBTA BOOBKA

Shaki kuma jiro in boobka uu madaxweynuhu ka qabanayo Xamar inay ka dhalan doonto xiisad siyaasadeed oo aan cawaaqibteeda la mahadin. Cid ku haysata ma jirto inuu madaxweynuhu iska magacowdo guddoomiyaha gobolka iyo guddoomiyayaasha degmooyinka. Balse inuu magacaabistaas u geliyo shaati “doorasho” waxay ka dhigan tahay inuu cusbo sii marinayo boogihii uu isagu u geystay dastuurka dalka.

Dalkeennu wuxu weli marayaa marxaladdii soo kabashada ee nugeylka badneyd, mana gaarin heer la isku xoog sheegto. Madaxweyne Xasan Shiikh wuxuu madaxweyne noogu yahay natiijadii lagu wada qanacsanaa ee kasoo baxday doorashadii 15-kii May 2022-kii iyo dastuurkii uu ku dhaartay isla habeenkaas. Haddii uu jiiro soohdimaha uu dastuurku dhigayo, oo uu muddo kororsi samaysto sida hadda ka muuqata, ama uu isku dayo inuu xoog nagu marsiiyo boob cad, wuxuu la kulmi doonaa iska caabbin aan ka yarayn middii uu qaybta ka ahaa kalkii hore.

Madaxweynaha Soomaaliya wuxuu mar walba ku joogaa qanaacada horweynta siyaasadda ay ku qanceen natiijada doorashada teendhada iyo aqoonsiga caalamiga ah. Labadaasba waa gabaabsi haatan. Waxaa madaxweynaha la gudboon inuu falaadka iska dhaafo, una soo jeesto inuu doorasho heshiis lagu yahay oo heer federaal ah ka qabto dalka. Taas ayayna kusoo dhammaan doontaa, si kasta oo uu madaxweynuhu darbiyada madaxa ugu soo garaaco.

**W/Q: C/raxman Caynte** waa Guddoomiyaha Xisbiga Xaqsoor, ahaana Wasiirkii Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah, iyo Danjirihii Soomaaliya u fadhiyey boqortooyada UK.

# MUSUQMAASUQA: KANSARKA HALISKA KU AH DADNIMADA IYO DOWLADNIMADA SOOMAALIYA



Cabdiraxmaan Cabdirasaaq



Xigashada Sawirka: internet

Dalka dunida ugu musuqmaasuqa badan in dalkaagu uu noqdo waa uur-kutaallo iyo rajo xumo weyn oo hanjabinaysa muwaadinka Soomaaliyeed ee isagu sanad walba daalacda warbixinta ay soo saarto Hay'adda Daahfurnaanta Caalamiga (Transparency International); taasoo Soomaaliya ka dhigta dalka 179-aad oo ka dhigan in uu yahay dalka dunida kaalinta 2-aad kaaga jira daahfurnaan la'aanta ama kaalinta 1-aad, muddo ku dhow 20 sano ayaysan Soomaaliya ka bixin xayndaabkaas oo markii dambe isu badashay xaalad tusaale loogu soo qaato marka la tilmaamayo ummad dowladnimadu ka burburtay oo musuq badan. Dhacdadii ugu dambaysay ee madaxweynaha dalka Maraykanka ee Donald Trump uu Soomaaalida ku tilmaamay dad liita oo dowladooduna ka burburtay ayaa ugu dambaysay, walow isagu afalagaadayn iyo colaadin gaar ah oo uu Soomaalida dalkiisa jooga u qaaday ay tahay kana dhalatay xifaaltanka siyaasadeed ee kala dhaxeeya Ilhaan Cumar oo dhalasho ahaan ka soo jeeda Soomaaliya oo katirsan Xisbiga Dimuqraadiga ah, lagana soo doorto gobolka Soomaalida u badantahay ee Minesota, haddana waa xaqiiq jirta ah in Soomaaliya aysan ka jirin dowlad taabbo gal ah.

Soomaalidu waa bulsho reer guuraa ah, hab-dhaqankeeduna waxaa sal u ah curfiga iyo nolosha Miyiga, wax badan oo tilmaamo fiicanna way leedahay oo ay ka mid tahay deeqsinimada, adkaysiga, geesinimada iyo isu-gurmashada, halka tilmaamo kale oo tabanna ay leedahay oo ay ugu weyntahay qabyaaladda, eexda, hayb-sooca iyo wixii la halmaala. Sahankii Richard Burton ee Bariga Afrika wuxuu buuggiisa ku sheegay intii uu u kala safrayey Saylac ilaa uu ka gaarayey Herar in safarkiisu uu adeegsanayey hadiyado iyo laaluush uu siinayey horjoogayaashii beelaha oo marka uu rabo deegaan inuu u tillaabo inuu qaybinayey tubaakada, baaruudda, go'yaal xariir ah iyo lacag taasoo ahayd laaluush, wuxuuna ku sifiiyey Soomaalida kuwa musuq, eex iyo inay ku xadgudbaan deegaanka oo weliba aad u aargoosi iyo aano badan.

Waxay Soomaalidu inta uusan gumaysiga soo cago dhigan dhulka Soomaaliyeed ka hor ahaayeen qabiillo ku yaacsan deegaanka Soomaalidu degto, mana u dhisnayn dowlad marka laga reebo saldanado meelaha qaar ka jiray oo horay u baaba'ay, waxaana jirtay gulufyo reer Galbeedku horay ay ugu soo qaadeen oo ka hor istaagtay Geeska Africa inay Soomaalidu ka dhisato dowlad ay leeyihiin, haba ugu weynaado dagaalkii u dhexeeyay Imam Axmed ibnu Ibrahim al-Ghazi (Axmed Gurey) iyo Boortaqiiska oo dhacay intii u dhaxaysay 1541–1543. Wixii ka dambeeyey waxaa aad looga ilaaliyey inay yeeshaan dowlad ka hirgasha Geeska Afrika oo Muslim ah Soomaaliduna hormuud u yihiin, balse Soomaalidu mayeelan wacyi iyo falsafad ay ku dhistaan dowlad ay hoos yimaadaan oo midaysa, waxayna sii ahaadeen qabiilo xeerar ay isku dhaqaan leh ilaa uu ka yimid gumaysigii reer Yurub oo isagu uga tagay mirir iyo dhaxal gurracan oo wata aafo walba oo burbur u horseedday dowladnimadii Soomaaliyeed.

Musuqa hareeyey dabaqadda siyaasadeed ee Soomaalida, wuxuu la kowsaday bilowgii askunkii dowladdii rayidka, waxayna noqotay hab-dhaqan ku tidcan maanka qofka Soomaaliga ah iyo fahamka uu ka haysto siyaasaddu inay tahay hab-dhaqan silloon oo dhagar iyo eex uu qofku ku gaaro kursiga, marka uu ka gacan buuxsadana ku duudsiiya inta kale xaqooda, danta guud na ay tahay mid aan cidna ka xigin oo uu suu doono ka yeelo. Dowladii kacaanka walow ay sanadihii hore wixii ka horreeyey 1976-dii ay isku day fiican ay samaysay; haddana waxay ku dhisnayd afgembi taasoo ka dhigaysay natiijadeeda mid ku dambaynaysa halkii ay ku dhammaatay 1991-kii, waana sida badi ay noqdeen dowladihii afgambigu ka dhacay ee Afrika. Wixii xigay ee jabhado iyo xukuumadihii heer federaal iyo maamul-goboleedyana waxay sii sharciyeeyeen musuqmaasuqa inuu noqdo waddada ugu mudan ee dowladnimo lagu gaaro, waana tan ka dhigtay in dabaqadda siyaasadeed ee Soomaalidu noqdaan kuwa ugu fasahaadka badan kuna hela xilalka boob iyo laaluush, doorashadii dhacday 2022 waxaa ku baxday wax kor u dhaafaya 200 Million oo dollar, waxaana la fili doonaa doorashada xigta inay kasii badan doonto, oo durbaba dadka xildoonka ahi dhaqaale uruursi ayay kusii jireen, waxaana baxay halhays ah " Musharaxa uu jeebku reebay" , taasoo ka dhigan qofkaan lacag wadan haba yeesho mudnaan walbee in uusan fursad fiicnayn.

Laaluushka wuxuu noqday hab-dhaqan siyaasadeed oo aysan bulshadu la yaabin, safaf dhaadheerna dadku u galaan qofka xildoonka ah si loo gacan mariyo sifo walba uu leeyahay iyo heer walba uu joogo, balse lagu kala xusho siyaasiyiintu siday u kala jeeb roonyihiin, heer Soomaalidu qofkii xil sare doonaya ee aan haysan awood shisheeye oo lacag siinaysa u taqaano qof fursad yar". Lacag maka heli kartaa, dowladaha lacagta baxsha?" Waa su'aasha ugu muhiimsan ee la waydiiyo qofkii xil sare ka raba inuu Soomaaliya ka qabto, iyadoo dhabtu ay tahay cidii lacag kasoo qaadatay dowlad shisheeye

uu u shaqaynayo danaheeda, waxayna arintaasi Soomaaliya dhaxalsiisay inay noqoto goob ay isku herdiyaan danaha shisheeye ee isdiidan ama dalkuba galo dagaalo uusan hal iyo nirig toonna ku lahayn (proxy war).

Musuqu wuxuu hareeyey dhinac walba, oo deeqaha ban'iidaantinimada ee caalamka aan ka helno, ganacsiga iyo badeecadda soo degta, macaamilka iyo isdhaafsiga suuqyada iyo xafiisyada dowladda iyo kuwa gaarka ah (private sector), habka shaqaalaysiinta, kaararka loo goosto dhakhaatiirta, boodhi baska diyaaradaha lagu raaco, maxkamadaha iyo hab qaadista garmaqalka, Booliska iyo sugidda amniga, askariga check point-ga taagan, macallinka imtixaanka saxaya, qofka qashinka gura, kuwa xoolaha qala intuba si maalinle ah waxay gacmaha kula jiraan musuqmaasuq. Waxay ka dhigantahay meel fiyow ma jirto oo wuxuu noqday dhaqan joogto ah oo uu qofka muraadkiisa ku gaaro.

## MAXAA MUSUQA WAX LOOGA QABAN WAAYEY OO UU U YAHAY MID SII FIDAYA?

Dowladaha uu ku baahay musuqa iyo maamul xumida wuxuu ku tilmaamay cilmi bulsho yaqaanka reer Spanish Manuel Castells "dowladaha dad qalatooyinka ah". Waana xaaladda ka jirta dalkeena inaan marayno markii uu naga burburay maamulka in dadku ay isqashaan oo waxaa sanadka 2025 ka dhacay Soomaaliya falal argagax leh oo muwaadiniin Soomaali ah si arxan darro ah loogu dilay qaybo kamid ah gobollada dalka, oo weliba qaarkood nolol lagu gubay kuwana la jirdilay heer dhimasho ah. Waxayna noqotay muuqaallo si joogto ah ay bulshada u aragto; haddana falalkaas in yar oo ka mid ah uun wax laga qabto badankoodana ay daysane yihiin, waxaana ka dhashay colaadaha beelaha dhexdooda iyo aanooyinka inay Soomaaliya kusii kordhaan.

Cabdi Abokor wuxuu u aanaynayaa in musuqmaasuqa aan waxba looga qabin karin oo ay u sabab tahay sidan: "Habrashada laga habranayo qabiilka ayaa ugu weyn inaan si macno leh la isula xisaabtamin, qofku kama baqo in lagu qaado xeer musuqmaasuq. Hadii lagu qabtona, inta badan waxaa is hortaaga madaxdii magacawday. Markaa waxaa wax walba ka horreeya, xoojinta dowladnimada, maamul wanaagga, mustaqbalka fiican ee isla xisaabtanka ku fadhiya wax ka awood weyn nidaamka-qabiilaysan oo aan sidii la doonayey u dabaqayn xeerarka maamula wanaaga."

***Cabdirisaaq Xaaji Xuseen Ra'iisul Wasaarahii Soomaaliya iyo tusaale siyaasi la diriray musuqmaasuqa dhibane-na u ahaa (1964–1967):***

Waxaa jiray tusaale weli xasuusta Soomaalida ku dhigan oo marka siyaasiyiinta hufnaanta ku caanbaxday lasoo qaato walow ay fara ku tiris ahaayeen, hadana waa muhiim inaan xusno si ay qormadeenu u dheellitirnaato, waa tusaale xilligii dowladii rayidka ahayd.

Magacaabista Cabdirisaaq Xaaji Xuseen ee xilka Ra'iisul Wasaaraha waxaa saldhig u ahaa go'aankiisa adag ee la dagaallanka musuqmaasuqa iyo kor u qaadidda maamul ku dhisan anshax iyo daahfurnaan. Inkastoo uu wajahay caqabado bilowgii hore, haddana xukuumaddiisu waxa ay kasbatay sumcad lagu yaqaan hufnaan, karti iyo daacadnimo.

Waxa uu hirgeliyay isbeddello ballaaran oo geesinimo leh, kuwaas oo ay ka mid ahayd dib-u-habayn lagu sameeyay adeegga rayidka si mudnaanta loo siiyo kartida iyo xaqa (meritocracy), taas oo sii xoojisay sumcaddiisa hoggaamiye daacadnimadiisu aan la shaki gelin karin. Dib-u-habayntiisa iyo aragtidiisa siyaasadeed ee horumarka ku dhisan waxay caro gelisay siyaasiyiintii diidanaa isbeddelka iyo kuwa kale oo dano gaar ah lahaa oo qabyaaladdu riixayso .

## WAXAY SOOMAALIYA KA DHAXASHAY MUSUQMAASUQA:

1. Dowlad taag daran oo aan lahayn hannaan dowli ah iyo mid amni oo laysku hallayn karo.
2. Dowlad aan la aamini karin, taasoo aan fursad u heli karin maalgelinta kaabayaasha dhaqaale sida korontada, waddooyinka, garoommo caalami ah, soo saarista khayraadka dabiiciga ah sida shidaalka iyo macdanta, iyo ka faa'iidaysiga kalluunka iyo beeraha.
3. Hantida qaranka oo lunta waxayna dowladdii Soomaaliyeed noqotay qandaraasyo ay leedahay beecmushtari, waxaa tusaale nool ah boobka ku socda dhulalka iyo xarumihii ummaddu lahayd oo sifa aan sharci ahay lagu xaraashtay caasimada Soomaaliya ee Muqdisho. Sidoo kale waxaa boob ku socdaa khayraadka dalku lahaa

kuwaasoo dowlado shisheeye ay iska qaataan si sharci darro ah.

4. Adeegii bulshada oo meesha ka baxay, waxaana aad u liita waxbarashada, caafimaadka, amniga, garsoorka iyo wax walba oo bulshadu ka rabtay dowladda, inta yar ee hada dadku helaan waa kuwa ku tiirsan deeqaha hay'adaha samafalka ah ee shisheeye, micnaheeda dowladda Soomaaliyeed canshuurteeda wax adeeg ah kuma bixiso inyar mooyee.

5. Rajo gab iyo hijrada cududda iyo caqliga Soomaaliyeed gaar ahaan dhallinyarada kuwaasoo oo caddaalad darrada iyo musuqmaasuqa ku kallifay inay dalka isaga haajiraan. Marka shaqooyinka aan aqoon iyo khibrad dad lagu qaadan oo ay eex iyo musuq noqotay waxay kalliftay dhallinyaro badan oo aqoon lahaa inay dalkooda isaga tahriibaan.

6. Hannaankii dowlad dhiskii Somaaliyeed oo taagan, welina waxaa qabyo qoraal ah dastuurkii 2012 mana jirto hab lagu midaysanyahay oo lagu dhammaystiro, waxaana murugsan habka doorashooyinka oo xilli walba oo doorasho lagu murmo siday u dhacayso. Doorashada 2026 ayaa aad u murugsan oo xaalad kalabayr ah dalka gelin karta hadduusan caqligu shaqayn oo aan maslaxadda dalka loo hiillin.

## GUNAANAD

Haddaba; in la ciribtiro dhaqanka musuqmaasuqa waa mid adag waqti dheerna u baahan, waxaase hubaal ah in madaxdu hadii ay bilowdo oo iyagu tusaale fiican noqdaan lana dagaallamaan caddaalad darrida iyo eexda, weliba ay ka bilaabaan kuwa ku hareeraysan ee iyagu sida gafanaha u jiqa hantida dadweynaha ay noqon lahayd mid la sii daadajiyo oo xafiis walba laga hirgeliyo haba qaadato waqti dheer. Waddamo badan oo Soomaaliya xorriyada ay isku mar qaateen ama ka dambeeyey ayaa jira oo markii hore aad u maamul xumaa; balse hogaamiyayaal usoo baxay darteed maanta ah dalal hodan ah oo horumar badan sameeyey sida Rwand (1962) oo waliba dagaallo sokeeyey gashay iyo isgumaadid, Malaysia 1960 dal sabool ahaa balse uu horumariyey Dr. Mahatir Mohamed iyo Siganpore oo ka go'day isla Malaysia 1965 balse maanta ah dal tusaalayaasha ugu fiican lagu soo qaato dunida.

Inta laga helayo hoggaamiye Soomaaliyeed oo sida dalalka aan soo xusnay u horseeda dalka iyo dadka Soomaaliyeed horumar, waxaa la dhaqangelin karaa tallaabooyinkan si looga hortago musuqmaasuqa ka jira hay'adaha dowladda, South Africa's Public Finance Management Act (Pillay, 2004) ayaa sidan ku talinaysa in la sameeyo, waa in la qaado tillaabooyinka soo socda :

- In la xoojiyo oo kor loo qaado anshaxa goobaha shaqada iyo dhaqanka fiican ee laga rabo shaqaalaha dowladda.
- In madaxda dowladdu xoojiso in ay ka go'an tahay in ay ka hortagaan musuqmaasuqa.
- In isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta maqaamkooda la dhigo.
- In Xeerrarka iyo habraacyada shaqada la isu akhriyo oo la isku wacyigeliyo.
- In haya'aduhu caado ka dhigtaan in siidhigga lagu afuufo meesha wax aan hagaagsanayni ka jiraan (whistleblowing).
- In la caadaysto abaalmarinta tusaaleyaasha wanaagsan.
- In maamulayaasha tusaale ku noqdaan anshaxa iyo hoggaaminta ku dhisan anshaxa.
- In ciqaab la mariyo ciddii la timaadda xad-gudub wax is dabamarin ah.
- In waxbarashada iyo tababarrada anshaxa la baahiyo, lana siiyo mudnaantooda
- In danta guud la hormariyo, lagana dhigo mudnaanta koowaad.

**W/Q:** Cabdiraxmaan Cabdirisaaq

Guddoomiyaha PUNSAA

# HAL DOOLAR OO HORSEEDAY HORUMAR WAARA:

## SHEEKADA HINDISE GAROOWE KA CURTAY PUNTLAND KU FAAFAY




Ahmed Abshir Jaamac



Xigashada Sawirka: AI

# HORDHAC

Dunida oo dhan waxaa ka socda dood iyo dadaallo xooggan oo ku saabsan sidii loo heli lahaa ilo-dakhli oo lagu xoojin karo adeegyada bulshada iyo horumarka. Dalalka horumaray iyo kuwa soo koraya, labadaba waxa ay muhiim u arkaan in la helo habab cusub oo bulshada ka qaybgelinaya horumarinta adeegyada, laguna dhisayo nidaam maaliyadeed oo waara. Fikradda ah in bulshada laga qaybgeliyo maalgelinta adeegyada nololeed—sida korontada, biyaha, waxbarashada, caafimaadka, kaabayaasha dhaqaalaha, iwm—waxa hadda loo arkaa mid ka mid ah xeeladaha caalamiga ah ee ugu wax-ku-oolka badan, gaar ahaan meelaha miisaaniyadda dowladaha hoose ay tahay mid kooban.

Gudaha Soomaaliya, dowlad-dhisku waxa uu ku socdaa marxalad dib u soo kabasho iyo isku-day lagu hagaajinayo maamulka, dhaqaalaha, iyo adeegyada bulshada. Degmooyinku waxay la tacaalayaan dakhli yari, ku tiirsanaan deeqaha caalamiga ah, kharashaad ka badan awooddooda, iyo baahi bulsho ee sii kordhaysa. Arrimahan ayaa keenay in si dhab ah loo qiimeeyo muhiimadda ay leedahay helitaanka ilo-dakhli gudaha ah (domestic revenue) oo degmooyinka ka caawiya inay noqdaan kuwo madaxbanaan, qorshayaal horumarineedna si joogto ah u hirgelin kara, iyadoo ay weliba muuqato in bulshada Soomaaliyeed ay diyaar u tahay inay ka qaybqaadato horumarinta deegaanka haddii loo abuuro hannaan hufan, daahfuran, oo natiijooyin muuqda keena.

Puntland ayaa noqotay meel si dhab ah u qaadatay muhiimadda qorshayaasha lagu xoojinayo dhaqaalaha dowladaha hoose. Degmooyinka Puntland waxay sanadihii u dambeeyay bilaabeen hirgelinta xalal cusub oo dakhli abuur ah si loo daboolo baahiyaha bulshada, loona yareeyo ku tiirsanaanta kaalmada dibadda. Inkastoo ay jiraan caqabado sida dhaqaale-xumo, isbeddelka cimilada, saboolnimada, iyo adeeg-yari, haddana Puntland waxa ay leedahay bulsho aad u firfircoon oo diyaar u ah inay taageerto horumar la taaban karo haddii ay aragto maamulka oo daacad ah, isla xisaabtan leh, oo natiijooyin wax-ku-ool ah keena.

Hindisaha Sanduuqa Horumarinta Degmooyinka ee halka doolar ee korontada iyo biyaha lagu kordhiyo, ayaa noqday tusaalaha ugu cad ee muujiyey sida Puntland uga jawaabtay baahida loo qabo in la helo ilo-dakhli bulshada ku tiirsan oo horumar ka abuura heer degmo. Garoowe oo ah caasimadda Puntland, ayaa noqotay halkii ay ka dhalatay fikradda isbeddelka abuurtay; hal doolar oo bishiiba lagu kordhiyo biilka korontada iyo biyaha si loogu maalgeliyo horumarinta magaalada. Fikraddaan oo ka timid baahi dhab ah—loona arkay mid fudud, la hirgelin karo, natiijo degdeg ah keeni karta—waxay noqotay tillaabadii ugu horreysay ee dhistay Sanduuq Horumarineed ee gudaha Soomaaliya.

# ASALKA IYO CURASHADA FIKRADDA

Sanadkii 2018, mar aan isu soo taagay xilka duqa degmada Garoowe, inkastoo aanan ku guulaysan tartankaas, waxaan si qotodheer u ogaaday jiritaanka caqabado waaweyn oo ku saabsan horumarinta degmooyinka Puntland, taas oo ah in aysan jirin qoondo miisaaniyadeed ama il-dakhli joogto ah, oo lagu maalgeliyo horumarinta adeegyada muhiimka ah iyo kaabayaasha dhaqaalaha. Degmooyinku badanaa waxay ku tiirsanaayeen laba il-dakhli:

1. **Canshuuraha maxalliga ah (local taxes):** Canshuuraha degmooyinka ayaa ahaa ilaha ugu muhiimsan ee dakhli gudaha ah (own-source revenue). Si kastaba ha ahaatee, canshuurahaasi waxay lahaayeen dhowr caqabadood oo saamayn ku yeeshay awoodda dowladaha hoose ee horumarinta.

- b) Canshuuraha oo kooban (narrow tax base): Tirada dadka awooda canshuur-bixinta aad ayay u yartahay oo inta badan bulshada waxaa ku badan saboolnimada, shaqo la'aanta iyo barakaca. Ganacsiyada yaryar ayaa ah kuwo kooban isla markaana dakhligoodu aad u hooseeyo. Canshuuraha qaarkood ma daboolaan xitaa kharashka lagu soo uruursho.

- t) Dakhliga soo xarooda oo ka badin waayey kharashaadka maamulka: Inta badan dakhliga canshuuraha waxaa lagu bixiyaa kharashaadka maamulka (revenue expenditure) sida mushahaarka shaqaalaha, hawlaha xafiisyada, amniga, shidaalka iyo dayactirka joogtada ah. Taas oo macnaheedu yahay in dakhliga ka soo xerooda canshuuraha uusan wax qoondo ah u reebin mashaariic horumarineed. Natiijadu waxay noqotay in aan la maalgelin karin wadooyin, nalal, ama adeegyada muhiimka ah ee bulshada, taas oo wiiqday horumarka yaraysayna kalsoonida shacabka.

2. **Kaalmooyinka iyo mashaariicda dibadeed (external aid & donor projects):** Isha labaad waxay ahayd mashaariic iyo kaalmo ka timaada hay'ado dibadeed, kuwaas oo inkasta ay gacan weyn geysteen, haddana aan lahayn joogteyn (sustainability). Mashaariicdu waxay ahaayeen kuwo goos-goos ah, shuruudo adag, hab-maamul aan si toos ah gacanta degmada ugu jirin, marar badana ku xiran ajandaha iyo mudnaanta hay'adaha caalamiga ah, ee aan ku xirnayn qorshaha horumarineed ee dhabta ah ee degmooyinka, tiiyoo yaraysay kalsoonidda ah in ay dhisaan horumar waara.

Haddaba, dareenkaygii jiritaanka baahida sare ku xusan ayaa waxay dhalisay fikraddii ahayd: "Hal doolar oo bishiiba lagu kordhiyo biilka korontada iyo biyaha, loona qoondeeyo horumarinta magaalada."

Kadib waxaan fikradda la wadaagay duqii Garoowe ee xilligaas -Axmed Siciid Muuse (Axmed Bare) iyo golihii deegaanka oo aan xubin ka ahaa, kuwaas oo si degdeg ah iila fahmay inay tahay fursad lagu abuuri karo sanduuq horumarineed oo waara, kana madax-bannaan saameyn dibadeed iyo isbeddelada siyaasadeed.

Intaas kadib, hirgelinta fikradda waxay martay geeddi-socod sharciyeyn oo hufan, taas oo ka bilaabatay in maamulkii degmadu fikradda si toos ah ugu bandhigay bulshada si loo helo taageeradooda iyo oggolaanshahooda (endorsement), taas oo ahayd tillaabadii ugu muhiimsanayd ee xaqiijisay in mashruucu noqdo mid bulsho leedahay oo ay iyadu ka tallo-bixisay. Kadib, golaha deegaanka ayaa si buuxda ugu codeeyey ansixinta fikradda iyo sharciyad siinteeda.

Si loo xaqiijiyo maamul-wanaag, isla-xisaabtan iyo madax-bannaani, waxaa la sameeyay xeer gaar ah oo lagu maamulo hindisaha, kaas oo qeexayey hab-raacyada, qaab-dhismeedka maamulka, iyo sida dakhliga loo maareeynayo. Waxaa sidoo kale la dhisay guddi madax-bannaan oo ka kooban xubno lagu kalsoonyahay oo ka kala yimid bulshada qaybheeda kala duwan, xubno kamid ah golaha deegaanka, kuwaas oo loo xil-saaray hirgelinta, hormarinta, kormeerka, iyo dabagalka hindisaha. Markii dhammaan shuruudihii sharci, bulsho iyo maamul la soo buuxiyey, degmada waxay si rasmi ah u guda gashay fulinta hindisaha—kaas oo keenay isbeddel muuqda oo maanta ka muuqda waddooyinka, adeegyada iyo bilicda guud ee Garoowe.

# FAA'IIDOOYINKA UGU MUHIIMSAN EE HINDISAHA

1. Waa il-dakhli oo Joogto ah: Hindisahaan wuxuu abuurayaa il-dakhli joogto ah oo degmooyinka u saamaxaya inay si madax-bannaan u qorsheeyaan una fuliyaan mashaariic horumarineed. Lacagta yar ee qoys walba bishii laga qaado waxay isu bedeshay maalgelin lagu hirgelinaayo adeegyo muhiim ah sida, wadooyinka, iftiiminta, dhiraynta, iwm. Dakhligan joogtada ah wuxuu soo jiidanayaa xasillooni maaliyadeed oo degmooyinka u ogolaanaya inay dhistaan qorshayaal dhalad ah oo waara.

2. Kalsooni bulshada: Hindisahaan wuxuu mustaqbalka kordhinayaa kalsoonida bulshada ee maamulka, maadaama shacabka ay arki doonaan lacagtooda oo isu beddeleysa horumar muuqda. Tani waxay soo jiidan doontaa ka-qaybgal ballaaran, u diyaarsanaanta bixinta canshuuraha, iyo wacyigelin bulsho oo xooggan.

3. Hufnaan maamul: Hindisuhu wuxuu u weelqaadayaa nidaam hufnaan iyo isla-xisaabtan maamul oo casri ah. Warbixinnada joogtada ah ee caddeynaya halka lacagtu ku baxdo waxay abuuri doonaan jawi daah-furan oo bulshada u saamaxaya inay door muuqda ku yeeshaan kormeerka iyo isla xisaabtanka. Tani waxay soo jiidan doontaa kalsooni dheeri ah, waxayna horseedi doontaa in adeegyada loo fuliyo si mas'uuliyad leh oo tayo leh.

4. Koboc dhaqaale: Hindisahaan wuxuu mustaqbalka dhow kobcin doonaa dhaqaalaha deegaanka, maadaama adeegyada aasaasiga ah ee lagu hirgeliyo sida iftiiminta, wadooyinka, nadaafadda iyo ilaalinta deegaanka, iyo horumarinta suuqyada—ay abuuri doonaan jawi ganacsi oo firfircoon, amniga oo wanaagsanaada, waddo marista oo fududaata, iyo nadaafadda oo korodha waxay soo jiidan doonaan maalgelin cusub, ganacsato badan iyo fursado shaqo. Horumarkan isku-dhafka ahi wuxuu noqonayaa sallaan dhaqaalaha degmooyinka si dhakhso ah u kiciya, isla markaana abuura koboc waara oo muddo fog sii socda.

# SAAMEYNTA & FAAFITAANKA FIKRADDA

Guusha ka hirgashay Garoowe, oo ahayd halkii hindisaha markii ugu horreysay laga hirgeliyey, ayaa noqotay tusaale ay deegaannada kale ee Puntland ku daydaan. Magaalada Garoowe oo noqotay tijaabadii ugu horreysay ayaa muujisay si cad in hal doolar bishii uu isu beddeli karo nidaam maaliyadeed oo dakhliga fiican soo xareeya, laguna dhaqaajiyo mashaariic horumarineed oo habboon. Taas ayaana sababtay in degmooyin badan oo Puntland ah ay si buuxda u hirgeliyaan halka kuwo kalena ay qorsheynayaan dhaqangelinteeda.

Faafitaanka fikirkan waxaa horseeday laba arrimood oo waaweyn: midda koowaad, waa in degmooyinka oo dhan ay arkeen natiijadii muuqata ee ka dhalatay Garoowe ee dhanka horumarka kaabayaasha dhaqaalaha oo si buuxda oo baraxla' looga maalgeliyey sanduuqaas. Midda labaad, waa in bulshada degmooyinkaas ay dareemeen in hindisuhu yahay mid iyaga ka yimid, iyaga u adeega, iyagana u soo celinaya waxqabad muuqda. Taasina waxay ka dhigtay hindisaha mid si dabiici ah ugu faafa Puntland inteeda badan.

Aniga ahaan, sharaf weyn ayay ii tahay in aragtidii yareyd ee Ilaahay qalbigayga ku soo tuuray sanadkii 2018, ay maanta isu beddeshay mashruuc maamul iyo bulshada Puntland oo dhan ku faanaan. Waxaan si gaar ah ugu faraxsanahay in fikraddaan ay noqoto dhaxal raad reeba, jiilasha dambana u noqda halbeeg ay ku cabir-qaataan, kuna dhisaan mustaqbal ifaya oo ku saleysan isku-tashi, hufnaan iyo horumar bulsho oo waara.

Sidoo kale, hindisahaan wuxuu caddeeyey in horumarka laga bilaabi karo fikrado yaryar, dhaqaale yar, laakiin leh hufnaan, hal-abuur, iyo ka-qaybgal bulsho. Waa tusaale muujinaya sida qaran dhan loo gaarsiin karo horumar joogto ah haddii la helo fikrad cad, maamul hufan iyo bulsho ay ka go'antahay hagaajinta noloshooda.

Waxaan rajaynayaa, aniga oo ku kalsoon, in maalmo dhow fikraddaan ay ka faa'iideysan doonaan ummadda Soomaaliyeed oo dhan, lagana hirgelin doono dhulka Soomaaliyeed oo dhan, ayna noqon doonto barnaamij mideeya, horumariya oo soo celinaya sharafteenii bulsho iyo awooddeennii isku tashi.

# MUSTAQBALKA FIKRADDA

Mustaqbalka fikradda hal-doolar wuxuu leeyahay fursad aad u weyn, maadaama ay horay u caddaatay waxtarkeedu. Haddii si joogto ah loo xoojiyo, hindisahani wuxuu isu rogi karaa qaab-dhismeed maaliyadeed oo rasmi ah oo degmooyinka Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya ka caawiya inay sameystaan sanduuqyo horumarineed oo waara (sustainable development funds). Ballaarinta fikradda iyo casriyeynta hab-maamulkeeda ayaa suurtagal ka dhigi karta in lacag yar oo bulshada ka timaadda ay u beddelanto mashaariic waaweyn oo kaabayaal, bilic, amni iyo adeeg bulsho maalgeliya. Si mustaqbalka fikraddaan ay u noqoto mid waarta, waxaa loo baahanyahay afar qodob in la hubiyo:

1. **Maamul hal-abuur leh:** Si mashruucyada bulshada ee noocan ah ay u sii waaraan, ma aha in maamulkiisu keliya lagu qiimeeyo hufnaan iyo daacadnimo, inkastoo ay yihiin qodobo muhiim ah, waxaa sidoo kale lagama maarmaan ah in maamulku noqdo mid aygarad ah oo hal-abuur leh, si joogto ahna ugu fikiraya sidii loo kobcin lahaa hindisaha loona sii ballaarin lahaa saameyntiisa. Hogaamiyeyaasha hindisahaan waa inay fahmaan in bulshooyinka, dhaqaalaha iyo tiknooloojiyaddu ay maanta ku socdaan xawaare aad u sarreeya, ayna tahay in hindisaha lagu ilaaliyo casriyeyn joogto ah.

   Maamulka hindisahaan waa in uu mar walba la socdaa isbeddellada wacyiga bulshada, baahiyaha soo kordhaya, iyo hubinta in mashruucu ku socdo jihada dadku ay rabaan. Hal-abuurka joogtada ah, dib-u-habaynta habraacyada, iyo ku-darista farsamooyin casri ah ayaa hindisaha ka dhigaya mid nool oo la jaanqaada waayaha cusub. Tani waxay sii xoojinaysaa kalsoonida bulshada, waxayna hindisaha u beddeli kartaa barnaamij istiraatiiji ah oo jiilba jiil ka dhaxlo.

2. **Ballaarinta ilaha dakhliga:** Ballaarinta ila dakhliga ee hindisaha, waa laf-dhabarta joogteynta iyo horumarinta fikirka, maadaama ku-tiirsanaanta hal-il oo keliya ay khatar gelin karto mustaqbalka hindisaha. Tusaale, marka adeegyada kale lagu daro nidaamka lacag uruurinta sanduuqa—sida ku-hadalka-taleefonada (mobile usage fee), adeegga biilasha internetka, adeegyada nadaafadda iyo qashinka (waste management services), ruqsadaha, tikidyada diyaaradaha iyo adeegyadkale ee bulshada, waxaa abuurmaya dhaqaale xooggan oo jaanibyo badan kayimid

bulshadana aan cuslayn. Tani waxay siinaysaa sanduuqa awood uu ku sii wado maalgelinta adeegyada muhiimka ah si joogto ah.

Ballaarinta ilaha dakhliga waxay keenaysaa in mashruucu yeesho awood dhaqaale oo ballaaran, taas oo u suurtogelinaysa inuu fuliyo mashaariic horumarineed oo tiro iyo tayaba leh, isla markaana waxay yareynaysaa khatarta isku halaynta hal-il oo keliya.

3. **Deeqaha dibadda oo la-dhexmaro sanduuqa:** Isku-xirka deeqaha caalamiga ah iyo sanduuqa horumarinta, waxay abuuraysaa nidaam mideysan oo la isku halayn karo, taas oo soo jiidata taageero joogto ah oo ka timaadda hay'adaha horumarinta. Marka deeq-bixiyeyaashu arkaan in barnaamijku leeyahay sanduuq sharciyeysan, hufan oo leh xisaab-celin joogto ah, waxay dareemayaan kalsooni, taas oo horseedda in taageero badan lagu wareejiyo sanduuqa. Tani waxay kordhinaysaa awoodda hindisaha ee lagu maalgelin karo adeegyo fara badan oo bulshada wax ku ool u ah.

   Qaabkan isku-dhafan wuxuu abuurayaa nidaam deggan oo isku dheelitira dakhliga gudaha iyo taageerada dibadda, isagoo hubinaya in hindisuhu uusan ku tiirsanaan hal il keliya. Waxay sidoo kale u oggolaanaysaa in deeqaha la helo lala beegsado mashaariic istiraatiiji ah oo si toos ah u xoojinaya adeegyada bulshada, iyada oo la ilaalinayo ujeeddadii asalka ahayd ee fikirka sanduuqa horumarinta.

4. **Adeeg cadaalad ah:** Adeegga oo caddaalad noqda ayaa ah midka ugu muhiimsan ee dhisaya kalsoonida bulshada, gaar ahaan marka qayb kasta oo bulshada kamid ah ay si cad u aragto in sanduuqa horumarinta laga siiyey qoondo. Tusaale, haddii xaafadaha magaaladdu dareemaan in wadooyinka, nalalka, biyaha ama adeegyada kale ee muhiimka ah ee laga maalgeliyay sanduuqa ay si siman uga wada faa'iideen, waxay abuuraysaa dareen ah "wada-lahaansho" iyo sinnaan. Tani waxay meesha ka saartaa shakiga ama tuhunka ku saabsan kala-reeb ama eex, waxayna bulshada ku dhiirrigelisaa inay sii wadaan habsami u bixinta dhaqaalaha.

# GUNAANAD

Hindisaha hal doolar ee ka bilowday Garoowe wuxuu noqday tusaalaha ugu habboon ee muujinaya awoodda isku-tashiga bulshada. Fikraddan oo ka timid baahi dhab ah, ayaa isu beddeshay hannaan maaliyadeed oo buuxshay kaalin bannaaneeyd oo muhiim ah, suurtogelisayna in adeegyo muuqda laga hirgeliyo magaalooyinka, keentayna kalsooni dhex marta bulshada iyo maamulka. Guushaas muuqata ayaa caddeysay in hal-doolar oo bulshada laga helo uu noqon karo furaha dib-u-dhiska kaabayaasha dhaqaalaha, bilicda magaalada, amniga, iyo koboca dhaqaalaha deegaanka.

Saameynta hindisahaan oo ku faafay degmooyin badan oo Puntland ah, waxay markhaati u tahay in fikraddu tahay noole leh awood ay kaga dhaqaaqdo halkii ay ka curatay. Mustaqbalka Hindisahaan wuxuu u muuqdaa mid isu beddeli kara barnaamij istiraatiiji ah oo heer gobol iyo heer qaranba lagu dabaqi karo, haddii la sii xoojiyo hufnaanta, hal-abuurka maamulka, ballaarinta ilaha dakhliga, loona qeybiyo si cadaalad ah adeegyada bulshada. Waa dhaxal bulsho oo muujinaya awoodda isku-tashiga Soomaaliyeed, islamarkaana u gogol-xaaraya jiilalka imanaya inay curiyaan hindisayaal wax ku ool ah oo u horseedaa horumar ay iyagu leeyihiin oo ay iyagu wataan.

**W/Q:** Ahmed Abshir Jaamac

# MAXAA HORTAAGAN BAAHINTA ADEEGYADA BULSHADA EE DOWLADDA SOOMAALIYA IYO HEERARKEEDA KALA DUWAN




**Ali Haji Warsame**
MA MBA CPA CGMA



Xigashada Sawirka: bbrief

# HORDHAC

Soomaaliya waa dal weli ka soo kabanaya colaado sokeeye oo daba dheeraaday, kuwaas oo soo socday muddo ku dhow ama ka badan soddon sano, taasoo sabab u noqotey awood-yarida hay'adihii dowliga ahaa ee la hanaqaadey dowladihii isku xigxigay ee dalka soo marey illaa shirkii Carta ee 2000. Arrintaasi waxay sababtay qaab maamul oo aan isu-dheelitirneyn, kaasoo si weyn u carqaladeeyay bixinta adeegyada bulshada ee aasaasiga ah sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha, iyo adeegyada kale ee la midka ah. Aniga oo ka mid ah dadkii goob-jooga u ahaa isbeddelkii ka dhacay dalka marka loo eego dowlad bixisa adeegyada aasaasiga ah ee muwaadiniinteeda waqtiyadii hore ilaa mid wax walba lumisay maanta, waxaan qormadaan kooban ku milicsanayaa aragtideyda ku dhisan waayo-aragnimadaas.

In kasta oo horumar laga sameeyay dhinacyada dhismaha hay'adaha dowladda illaa Carta ee sannadkii 2000 lagu soo dhisay Djibouti, haddana bixinta adeegyada iyo buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee bulshada waa mid aan joogto ahayn, miisaaniyad xadidan leh, oo mararka qaar xitaa aan loo sinnayn. Nidaamka federaalka, inkastoo si dastuuri ah loo oggol yahay, haddana wuxuu la daalaa dhacayaa faham cad la'aan, maamul dhaqaale oo xaddidan, iyo isku xirka liita ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah.

Qormadaan kooban waxay bixineysaa falanqayn ku saabsan xaaladda hadda ee bixinta adeegyada bulshada ee Soomaaliya, iyadoo iftiiminaysa caqabadaha waaweyn ee hortaagan in bulshadu helaan adeeg asaasi ah iyadoo ay sabab u yihiin arrimo badan oo ay ka mid yihiin amni-darro, la'aanta kaabayaasha muhiimka u ah, maamul xumo maaliyadeed ee hantidii dadweynaha, musuqmaasuq baahsan, shaqaale rayid oo aan xirfad lahayn, iyo kalsooni-darro hoose oo ka dhex jirta muwaadiniinta iyo dowladda heerarkeeda kala duwan. Waxay sidoo kale dib u eegis ku samaynaysaa dadaalladii dhawaan la sameeyey, dhinaca federaaleynta, barnaamijyada ay maalgelinayaan deeq-bixiyeyaasha, iyo tijaabooyinka ku lug leh lahaanshaha muwaadiniinta, kuwaas oo muujiyey rajo wanaagsan oo ku saabsan hagaajinta bixinta adeegyada maxalliga ah.

Si loo xalliyo farqiyada jira, qormadaan waxay ku talineysaa dhowr qaab oo loo wajihi karo arrintaas, laga bilaabo xoojinta is-qaadashada iyo wada-shaqeynta heerarka kala duwan ee dowladda, maalgelinta awoodaha dowladaha hoose, mudnaan-siinta hababka ka qaybgalka muwaadiniinta, iyo kor u qaadidda daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka bixinta adeegyada dadweynaha. Waxa kale oo ay xoogga saareysaa muhiimadda isticmaalka tiknooloojiyadda casriga ah iyo khibradda degdegga ah ee Soomaalida qurbaha ku nool si loo buuxiyo baahiyaha jira. Ugu dambeyntiina, waxay soo jeedinaysaa tallooyin ujeedadoodu tahay in la abuuro nidaamka bixinta adeegyada bulshada si looga jawaabo baahida muwaadiniinta.

# FALANQEYNTA XAALADDA

Dagaalkii sokeeye ee ka dhacay Soomaaliya wuxuu ahaa cutub xanuun badan oo ka mid ah taariikhda dalka, iyadoo xitaa 35 sano kadib markii uu qarxay, saameyntiisu ay weli ka muuqato dhammaan qaybaha nolosheenna. In kasta oo xaaladdu aysan qummanayn xilligii ka horreeyay colaaddii ahliga aheyd, haddana waxaan lahayn waxyaabo aan ku faani karno, sida waxbarasho bilaash ah, adeega caafimaadka aasaasiga ah ee bilaashka ah, ammaanka guud ee dalka oo sugnaa, gaar ahaan ka hor dagaalkii Soomaaliya iyo Itoobiya 1977/78, helitaanka adeegyada aasaasiga ah ee dowladda bixiso, iyo heerka shaqo ee ku filan ee dhallinyarada qalinjebisa, maadaama dalka uu ka socdey horumar muuqda, iyadoo la dhisay warshado badan oo cusub.

Soomaaliya waxay isaga filnayd adeegyada aasaasiga ah sida cuntooyinka xilliyada wanaagsan ee roobka la helo, waxaana dowladdu dejisay siyaasado lagu dhisayo deegaameynta magaalooyinka iyo tuulooyinka xeebaha ku yar si loo taageero kuwa lumiyay xoolahooda, xilligii abaartii ba'neyd ee Daba-dheer. Aniga iyo dadka jiilkeyga ahna waa markhaatiga nool ee ka faa'iideystey adeegyaddii dowladda dhinac kasta.

Si kastaba ha noqotee, dhammaan arrimahaas si kedis ah ayay isu beddeleen, waxaana dhibaatadu noqotay wax caadi ah halkii dowladda lagula xisaabtami lahaa inay bixiso adeegyada bulshda, taasoo ka dhigtay in bixinta adeegyada aasaasiga ah ay noqoto mid aan macquul ahayn ama aysan dowladdu xisaabta ku darsan. Dhowaan bay aheyd markii wasiir ka tirsan dowladda federaalka oo si aan qarsi lahayn u yiri in aan dowladda xaq loogu lahayn adeegyadda aasaasiga ah sida waxbarashada iyo caafimaadka, haddii ay bixisana ay tahay sadaqo. Nasiib-darro ma jirto cid dowladda heerarkeeda kala duwan ka mid ah oo arrintaas ka hadashay ama ka daba-tagtey.

Marka aan leennahay falanqaynta xaaladda, waxaan ula jeedaa inaan qiimeyno arrimaha gudaha iyo kuwa dibadda ee saameynaya dhibaatooyinka iyo caqabadaha adeegyada bulshada ee Soomaaliya guud ahaan, si loo aqoonsado waxyaabaha ka maqan, iaydoo lagu qiimeynayo nidaamka loo yaqaan (SWOT), ee tilmaama halka dowladdu ku xoog badan tahay, dhinaca ay ku liidato ama daciifka ku tahay, fursadaha jira, iyo khataraha iman kara. Si arrintaas wax looga qabto, waxaan xooga saareynaa caqabadaha horyaalla dalka meelaha muhiimka ah.

Mid ka mid ah meelaha la taaban karo waa maamul wanaagga, kala qaybsanaanta hay'adaha dowladda heerarkeeda kala duwan iyo isku xirnaansho la'aanta qaab-dhismeedka nidaamka federaalka ah, kaasoo lagusoo dhisay heshiiskii Mbagathi ee 2004, islamarkaana markii dambe lagu xoojiyay Dastuurka Ku-Meelgaarka ah ee 2012, iyadoo aan si buuxda loogu heshiin awood-qeybsiga iyo kheyraad-qeybsiga. Maqnaanshaha qaab-dhismeed dastuuri ah oo dhamaystiran iyo kala soocida masuuliyadaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah (DXDF) ayaa sababtay jahwareer, mas'uuliyado isku dhafan, iyo tartan ku saabsan waxqeybsiga gaar ahaan kaalmooyinka caalamiga ah iyo kheyraadka dalka.

Intaas markaad ku darto xaaladda amni la'aanta iyo xaddida isu-socodka bulshada, gaar ahaan meelaha ay maamulaan kooxda xagjirka ah ee Al-Shabaab, gaar ahaan gobollada koonfur-bartamaha dalka, taasoo caqabad ku noqota bixinta adeegyada bulshda. Al-Shabaab waxay xoog ku haystaan dhul ballaaran, taasoo xaddidaysa gaarista adeegyada bulshada iyo helitaanka kaalmada bani'aadamnimada, isla markaana waxay si toos ah u carqaladeeyaan maalgelinta adeegyada bulshada, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo ka faa'iideysiga kheyraadka dalka.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in la xuso maareynta miisaaniyadda dowladda heerarkeeda kala duwan oo daciif ah iyo ku-dhaqanka xaddidaadaha miisaaniyadda, waxaana sabab u ah maqnaanshaha nidaamka maamulka maaliyadda (Public Financial Management), taasoo dhaawaceysa hirgelinta miisaaniyadda si nidaamka waafaqsan, qaabka wax-soo-iibsiga dowladda oo xor ah (fair Public Procurement Process) iyo isla-xisaabtanka guud ahaaneed.

Soomaaliya mar walba waxay ku qiimeysan tahay hooseynta nidaamka hufnaanta maaliyadeed, iyadoo musuqmaasuqa baahsan uu wiiqay kalsoonida dadweynaha iyo bixinta adeegyo wax ku ool ah. Dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah ma laha nidaam iyo awood ay ku ururiyaan canshuuraha ama ay si wax ku ool ah u maamulaan dakhliga soo xarooda, taasoo keenta in adeegyada muhiimka ah loo waayo maalgelin ama si liidata loo maamulo.

Sidoo kale, baahinta adeega bulsho ee Soomaaliya wuxuu la kulmaa farqi ballaaran iyo kala duwanaansho nolosha magaalo iyo baadiye (urban and rural), iyadoo qiyaastii 60% dadka ku nool yihiin deegaanno tuulooyin iyo baadiye ah, halkaas oo noloshooda inta badan ku tiirsantahay xoolaha. Bixinta adeegyada bulshada ayaa badanaa ku kooban magaalooyinka waaweyn, sida Muqdisho, Hargeysa, Garoowe, iyo caasimadaha kale ee dowlad-goboleedyada, halka deegaannadda baadiyaha ah iyo kuwa colaaduhu si ba'an u saameeyeen ay weli adeeg la'aan yihiin oo aan si fudud loo gaari karin.

Barakacayaasha gudaha (IDP), oo sida la xaqiijiyey ay tiradoodu ka badan tahay 2.9 milyan, ayaa waxay la kulmaan caqabado badan oo ku saabsan helidda adeegyada bulsho oo aasaasiga ah. Waxaa mudan in la xuso in khilaafaadka soo noqnoqda ee deegaannadda iyo barakacinta dadka ay mar walba carqaladeeyaan howlaha dowladda iyo helitaanka adeegyada. Ugu dambayn, ka-qaybgal la'aan muwaadiniinta heer kasta oo la xiriira saamaynta siyaasadda iyo la-tashiyada hirgelinteeda ayaa xaddidaya in ay talo ku yeeshaan helitaanka iyo ka qaybqaadashada dadweynaha ee bixinta adeegyada bulshdada. Isla mar ahaantaana, qorsheynta iyo dabagalka waa mid aad u kooban.

Muwaadiniintu badanaa ma helaan meel ay ku muujin karaan welwelkooda, ku soo gudbin karaan tallooyinkooda ama ku weydiin karaan bixiyayaasha adeegyada mas'uuliyadda ay leeyihiin, taasoo sii xumeysa kalsoonida bulshadu ku qabto hay'adaha dowladda.

## XALALKA LA HIRGELIN KARO

Anigoo ka mid ah dadka si weyn u la socday caqabadaha Soomaaliya ka horyimid tan iyo 2012 ee la xiriira bixinta adeegyada bulshada, haddana waxaan aaminsanahay in ay muhiim tahay in la aqoonsado dhaxalka dagaalkii sokeeye iyo burburkii ku habsadey nidaamka dowladnimada. Dhacdooyinkani waxay ka tageen hay'ado daciif ah oo kala firirsan. Intaa waxaa dheer, maqnaanshaha wada-xaajood bulsho iyo isku raac siyaasadeed oo u dhexeeya siyaasiyiinta, muxaafid iyo mucaaridba, taasoo sababtay siyaasado ma-dhaleys ah iyo maamul-xumo baahsan. Sidaas darteed, daciifnimada hay'adaha dowliga ah ayaa furtay albaabka faragelinta shisheeyaha, gaar ahaan dalalka deriska ah iyo qaar ka mid ah hay'adaha caalamiga ah, kuwaas oo mararka qaar sii adkeeya kala qaybsanaanta gudaha, si ay u gaaraan danaha ay leeyihiin.

Iyadoo markaas la tixgelinayo falanqaynta xaaladda ee aan kor ku soo sheegay, waxaa muhiim in la helo xalalka macquulka ah oo waara, iyadoo la tixgelinayo daciifnimada nidaamka dowliga ah, yaraanta ama ciriirka ka faa'iideysiga kheyraadka dalka, hoos u dhaca dakhliga, iyo joojinta kaalmooyinka caalamiga ah oo hadda si dhab ah u bilaabmatay, kuwaas oo dhammaan ahaa laf-dhabarta badbaadada dalka 25-kii sano ee la soo dhaafay, shirkii Carta kadib oo lagu aas-aasay dowladdii ku-meel-gaarka aheyd ee ugu horeysay.

Iyadoo taas maskaxda lagu hayo, waxaan eegi karnaa siyaasadaha ugu muhiimsan, uguna wax-ku-oolka badan ee lagu wajahayo caqabadaha degdegga ah ee bixinta adeegyada bulshda, waxaana lagu soo koobi karaa sida soo socota:

## DIB-U-HABEYN IYO BAAHINTA NIDAAMKA DOWLADEED (DECENTRALIZED REFORMS)

Sababo la xiriira dagaalkii sokeeye ee xanuunka badnaa iyo kala qaybsanaanta shacabka ee aagag, gobollo, iyo dowlad goboleedyo, ayaa noqdey caqabadaha ugu waaweyn ee baahinta adeegga bulshada. Dib-u-habeynta iyo horumarinta nidaamka dowladeed, heerarka kala duwan, waa lama huraan waana waddo dhab ah oo lagu horumarin karo bixinta adeegyada. Qaabka hoos-ka-dhiska (bottom-up approach), oo la isticmaalay aasaaskii maamulladda Somaliland iyo Puntland labadaba, wuxuu ahaa barnaamij tijaabo dhab ah, si loo muujiyo loona caddeeyo in dowladaha hoose ay awood u leeyihiin inay bixiyaan adeegyada aasaasiga ah marka la siiyo miisaaniyad iyo madax-bannaani maamul, halka adeeg bixinta dhexe ee dowaldda dhexe ay la kulanto caqabado maamul (bureaucracy) iyo ku-tagrifal miisaaniyaeed iyada oo aan natiijo muuqata la helin.

## TOOSINTA GARGAARKA DEEQ-BIXIYEYAASHU CAALAMIGA AH (TARGETED DONOR FUNDS)

Deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah iyo saaxiibada Soomaaliya, gaar ahaan Bangiga Adduunka, Qaramada Midoobay, Midowga Yurub, iyo kuwo kale oo badan, horay waxay u taageeri jireen hindiseyaal ay ka mid yihiin Barnaamijka Wadajirka ah ee Dowladaha Hoose (JPLG) iyo barnaamijyo kale oo ku aadan dowladaha hoose oo ah heerka

3-aad ee nidaamka faderaalka ah, kuwaasoo ujeedkoodu tahay xoojinta hay'adaha dowladaha hoose iyo hagaajinta bixinta adeegyada aasaasig ah.

Si taas loo xaqiijiyana waa in loo maraa tubta dhisidda awood maamul ee dowladaha hoose, tababarka xirfadaha, iyo maalgelinta kaabayaasha dhaqaalaha. Hindisahaas waxaa laga gaarey natiijooyinka togan oo gaarey dhammaan gobollada iyo degmaayinka waaweyn.

## QAAB HABBOON OO AY MUWAADINIINTU TALO KU YEELAN KARAAN (CITIZEN ENGAGEMENT)

Doorashooyinkii degmooyinka ee dowladda Puntland waxay u adeegtey sidii loo taabagelin lahaa barnaamij tijaabo ah oo la xiriira qorsheynta wadajirka ah (participatory planning) iyo qaababka jawaab celinta (feedback mechanisms). Taasi waxay muujisay in ka qaybgalka muwaadiniinta ee kala mudnaanta (naqshadeynta) adeegyada, kormeerka doorashooyinka hoose, iyo ka qaybqaadashada la-talinta deegaanku ay kordhin karto qanacsanaanta muwaadiniinta iyo isla xisaabtanka.

Hay'ado badan oo maxalli ah (local NGOs) oo ku yaal dowlad-goboleedyada kale, sida Galmudug iyo Koonfur-Galbeed, ayaa sidoo kale sheegay inay kordhisay ka qaybgalka dadweynaha ee diyaarinta miisaaniyadda hoose iyo kaabayaasha dhaqaalaha, taasoo ka sarreysa dadaallada dowladda dhexe ee Muqdisho.

## DIB-U-HABEYNTA QAYBAHA KALA DUWAN EE ADEEGA (SECTORAL REFORMS)

Marka la eego qaybaha muhiimka ah ee adeegga bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, iyo ilaalinta deegaanka, qaar ka mid ah wasaaradaha heer federaal iyo maamul-goboleed ayaa sameeyay qorshayaal istiraatiiji ah iyagoo la kaashanaya ururada aan dowliga ahayn (NGOs) si loo ballaariyo helitaanka iyo bixinta adeegyada. Haatan, dadaalladan badankoodu waxay hoos yimaadaan deeq-bixiyeyaasha, mana laha waaritaan muddada-dheer ah (long-term sustainability). Aragti-bedelka (perception) ayaa muhiim u ah helitaanka iyo bixinta adeegyada aasaasiga ah oo waara.

## TALO SOO JEEDIN

Caqabadaha hortaagan bixinta adeegyada bulshada waxay daciifiyaan horumarka, horseedaan sinnaan-la'aanta, isla markaana waxay wiiqaan kalsoonida bulshada. Marka la eego dowladnimadeena oo jilicsan, caqabadahaasi waxay kicin karaan cabashooyin iyo khilaaf. La-tacaalidda caqabadahan waa lama huraan si loo dhiso hay'ado adkaysi leh, si loo hagaajiyo tayada nolosha muwaadiniinta. Iyadoo doodda lagu saleynayo xaaladda caqabadaha haysta Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah, waxaan halkaan ku tilmaami doonaa xalalka muuqda, iyo talooyinka kooban oo lagu wajahayo xaaladda, waxaana ka mid ah:

## CADDEYNTA DOORKA DOWLADDA DHEXE IYO DOWLADAHA XUBNAHA AH

Caqabadaha muuqda waxaa ka mid ah fashilka dastuurka ku-meel gaarka ah ee caddeyn waayey doorka ay leeyihiin dowladda dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah marka laga reebo afar awoodood oo loo qoondeeyey dowladda dhexe, sida arrimaha dibadda, difaaca dalka, jinsiyadda iyo socdaalka, iyo siyaasada lacagta. Mararka qaarkood dowladda dhexe ayaa hakad gelinaysaa ama caqabad ku ah dadaallada lagu horumarinayo adeegyada bulshada, sidaa darteed waa muhiim in la soo afjaro dhammaystirka dastuurka federaalka ah iyo qeybsiga awoodaha saddexda heer ee dowlad-dhiska Soomaaliya, iyadoo isla markaana si cad loo qeexayo masuuliyadda adeeg bixinta ee u dhaxaysa Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah.

## XOOJINTA AWOODAHA DOWLADAHA HOOSE

Iyada oo lagu saleynayo rikoorka cad ee dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah ee ku saabsan bixinta adeegyada, waa lagama maarmaan in la ballaariyo awoodda iyo hab-maamulka dhaqaalaha si loo suurtageliyo in dowladaha hoose ay ururiyaan oo maareeyaan dakhliga. Sidoo kale waa muhiim in la siiyo kaalmada farsamo iyo tababar ee ay u baahanyihiin, gaar ahaan kuwa ku saabsan miisaaniyadda, qandaraasyada, iyo maareynta adeegyada.

## HORUMARINTA KA-QAYBGALKA MUWAADINIINTA

Sida aa soo sheegay ee xalalka la hirgelin karo, iyo iyadoo laga faa'iideysanayo guulaha dowladaha Puntland iyo Somaliland ee ballaarinta barnaamijyada ka qaybgalka muwaadiniinta ee dowladaha hoose, waxaa muhiim ah in la hagaajiyo qorsheynta ka qaybgalka bulshada iyo la-xisaabtanka bulshada ee dowladda. In la dhegaysto dadweynaha sidii loo baahin lahaa adeegyada bulshada waa muhiim, waxayna soo dhoweyneysaa xalka looga hortagayo caqabdaha adeeg bixinta ama adeeg-baahinta.

## HAGAAJINTA MAAREYNTA ARRIMAHA MAALIYADDA

Marka laga hadlayo maareynta arrimaha maaliyada, Soomaaliya waxay kaga jirtaa adduunka meesha u hooseysa, sannad kastana waxay ku guuleysataa in loo aqoonsado dalka adduunka ugu musuq-masuq badan (Transparency International corruption Index). Iyadoo ay taasi jirto ayaa haddana waxaa Soomaaliya ka socda dadaalo badan oo ku aadan hagaajinta Qaab-dhismeedka Dijitaaleynta Maareynta Maaliyadda (Public Financial Management Digitalisation Framework), oo ah hindise cusub oo loogu talaggalay in lagu casriyeeyo nidaamka maaliyadda dowladda dhexe, laguna horumariyo daahfurnaanta iyo hufnaanta maaliyadeed, isla markaana lagu yareeyo khataraha musuq-maasuqa.

Dhowaan, Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Dhexe ayaa yiri: "Barnaamijkan, oo dhaqan-gali doona isla sannadkan, wuxuu kordhin doonaa waxtarka, xoojin doonaa isla xisaabtanka, oo ilaalin doona hantida dadweynaha." Si kastaba ha ahaatee, barnaamijkaan waxaa hortaagan hirgelintiisa caqabado waaweyn. Si loo hagaajiyo, waxaa muhiim ah in la horumariyo oo la dijitaaleeyo uruurinta dakhliga iyo kharashaadka raaca, loona yareeyo khasaaraha kharashka iska baxaya. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in la siiyo hay'adaha Hantidhowraha Guud iyo Xisaabiyaha Guud madax-bannaani maamul oo dhammaystiran, isla markaasna la xoojiyo kormeerka baarlamaanka si loo sameeyo hubin iyo isu dheelitirnaan u dhaxaysa awoodaha fulinta iyo sharci-dejinta ee dowladda. Illaa haddeer hab-dhaqanka dowladda dhexe kama muuqato wax isbedel ah oo dhinacaas u hiiliniya, haddiiba aysan ka sii darin.

## KA FAA'IIDAYSIGA TIKNOOLOOJIYADA IYO FIRFIRCOONIDDA QURBAJOOGTA SOOMAALIYEED

Dagaalkii sokeeye waxaa ku barakacay in ka badan 2 milyan oo hadda ah qurba-joog firfircoon, kuwaas oo intooda badan ku nool Yurub iyo Waqooyiga Ameerika. Qurbajoogta Soomaaliyeed waxay u diraan Soomaaliya inta u dhexeysa $1.4 bilyan iyo $2 bilyan oo doolar sanadkiiba, iyadoo taageeradaasi ay gaarto ku-dhawaad kala bar qoysaska Soomaaliyeed, iyadoo taasi ay ka hortagto burbur dhaqaale. Marka laga soo tago lacag-dirista, xubno badan oo qurbajoog ah waxay ku soo laabtaan dalkooda iyagoo wata xirfado, waxbarasho, iyo waayo-aragnimo ay ka heleen dibadda.

Sidoo kale, Soomaaliya waxaa si weyn loogu yaqaan isticmaalka lacagta dijitaalka ah iyo adeegga internet-ka ee degdegga ah, kaas oo ka horreeya inta badan dalalka Afrika. Taas waxaa looga faa'ideysan karaa horumarinta hab-maamulka dijitaalka ah dhinaca ururinta

codsiyada adeegga, jawaab celinta, iyo kormeerka waxqabadka. Intaas waxaa dheer, arrintaan waxaa loo adeegsan karaa in la abuuro barnaamijyo nidaamsan oo la isku xiri karo xirfadlayaasha qurbajoogta ah iyo hay'adaha bixiya adeegyada.

## CADAALADDA IYO U-SINNAANTA BIXINTA ADEEGYADA

Dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya ayaa dadkeena ku reebay calaamado, ay ka mid yihiin welwelka nafsaaniga ah iyo cuduradda dhimirka, mana aysan helin dadaalo ku aadan sidii loo xallin lahaa arimahan oo keeni karta dhibaato sii kordhinaysa xanuunka, natiijaduna waxay ka muuqataa bulshada oo dhan. Si loo aqoonsado xaqiiqdaas, waxaa muhiim ah in la horumariyo bixinta adeegyada meelaha miyiga ah iyo xeryaha barakacayaasha, iyadoo sidoo kale si habboon loo dhexgelinayo xaga qorsheynta iyo bixinta adeegyada qeybaha kala duwan ee bulshada gaar ahaan dumarka iyo naafada.

Ugu dambayn, wax ka qabashada caqabadaha bixinta adeegyada bulshadu waxay u baahantahay wada-shaqeyn iyo wadajir siyaasadeed oo dhex mara Dowladda Federaalka ah iyo Dowlad-Goboleedyada, dib-u-habeyn hay'adaha maaliyadeed, daadejinta adeegyada, hal-abuurnimo tignooloojiyadeed, iyo ka faa'iidaysiga ilaha dhaqaalaha ee dalka oo si dhaqso ah u kobcaya iyo tan qurbajoogta Soomaaliyeed. Sidoo kale, haddii aan la helin ka qaybqaadashada dhammaan daneeyayaasha siyaasadda, ha ahaato dowladda, bulshada rayidka ah, beesha caalamka iyo qurbajoogta, waxba soo kordhin meyso in laga hadlo adeeg dhab ah oo loo fidiyo bulshada, kaasoo oo adkaysi u leh, kana jawaabaya baahiyaha bulshada.

W/Q: Cali Xaaji Warsame

# MIDNIMO MISE GOONI-GOOSAD? JAHAWAREERKA ARAGTIYEED EE INDHEERGARADKA PUNTLAND



Saki Rabiica




**Xigashada Sawirka:** Kaab TV

Muddooyinkii u dambeeyay, Puntland waxay wajahaysaa jaahwareer aragtiyeed oo sii xoogaysanaya, kaas oo taabanaya labada tiir ee ugu muhiimsan siyaasaddeeda: midnimada Soomaaliyeed iyo maamul goboleed taladiisa u madaxbannaan. Labadan tiir—oo markii hore isu-dheelitirnaa—maanta waxay ku jiraan khilaaf qoto dheer oo saameyn ku yeeshay bulshada, indheergaradka, iyo hoggaanka siyaasadeed; khilaafkaas oo ay abuureen siyaasiyiin dano gaar ah leh oo marar badan shacabka ku awr-kacsada.

# HIMILADII PUNTLAND IYO JAAHWAREERKA CUSUB

Puntland markii la asaasay 1998-dii, waxa ay lahayd laba himilo oo cad cad:

1. In Puntland yeelato maamul leh qaab-dhismeed dhammaystiran oo ka shaqeeya nabadgelyada, dhaqaalaha, islamarkaasna daboola baahiyaha bulshada inta la gaarayo dowlad Soomaaliyeed oo Federaal ah oo ay Puntland qayb ka tahay.
2. In ay noqoto maamul goboleed federaal ah oo qayb ka ah dhismaha dowlad Soomaaliyeed oo loo dhanyahay oo u adeegta dhammaan bulshada Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan.

Laakiin maanta, indheergaradka reer Puntland waxay wajahayaan su'aal adag oo oranaysa:

Puntland weli ma u taagantahay himiladii ilaalinta midnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed, mase waxay ku sii siqaysaa qaab u eg dowlad madax-bannaan (goonni-goosad) oo horseedda kala go'a Soomaaliya iyo burburka midnimadii halganka iyo dhiigga loosoo daadiyey?

**Doorashooyinka Soomaaliya iyo hayaanka madaxda Puntland ee Muqdisho!**

Markasta oo la gaaro xilliga doorashooyinka Soomaaliya, Puntland waxa ay gashaa xaalad murugsan oo abuurta hubanti la'aan siyaasadeed, maadaama hoggaanka iyo indheergaradka qaar ay si buuxda ugu jeestaan Muqdisho; iyagoo isku dayaya inay kaalin ku yeeshaan loolanka kursiga madaxtinnimada ee Villa Soomaaliya; iyagoon hayaankoodaan ka talogelin haldoorka bulshada iyo horweynta siyaasaddaba; arrintaan waxay hakisaa shaqada gudaha, mashquul gelisaa hay'adaha dowladda, hoos u dhigtaa kalsoonida shacabka, isla markaana sii hurisa su'aasha weligeed taagnayd ee ah: Puntland yaa dhab ahaan ugu shaqeeya—qof, beel mise bulsho dhan? Yayse ka go'daa go'aanka in hoggaanka dalku isku sharraxo madaxtinimada Dowladda Federaalka Soomaaliya, isagoo ah Madaxweynaha Dowladda Puntland?

Sannadkan waxa aad u muuqata cabsi kale oo weyn; taasoo u muuqata

in mar labaad hantidii, saami-qaybsigii, iyo magacii Puntland ay markale noqdaan xoolo siyaasadeed oo lagu raadinayo kursiga madaxweynaha Soomaaliya.

Tani waa mid bulshada ku sii abuureysa dareen ah in Puntland mar kasta loo arko keliya "jid loo maro ama lagu gaaro Villa Soomaaliya", halkii ay ka ahaan lahayd maamul leh sharaf iyo miisaan siyaasadeed oo u gaar ah, kuna mashquula danaha dadka reer Puntland.

**Indheergaradka: Kuul-kuul Siyaasadeed iyo Dood La'aan Aragtida Maqaamka Puntland**

Indheergaradka Puntland waxaa laga filayay inay hoggaamiyaan dood furan oo qeexda mustaqbalka maqaamka Puntland, balse taa beddelkeeda waxaa muuqata in qaar ay ku milmeen siyaasadda Muqdisho, kuwo kalena ay danaha beeluhu ka leexiyeen aragtidoodii guud, halka inta badanna ay ka maqantahay dood cilmiyeed qoto dheer oo si cad u tilmaamaysa waxa ay Puntland rabto tobanka sano ee soo socda.

Jaahwareerkan fikirka ahi wuxuu abuuray madhaleysnimo:

Puntland ma rabtaa federaal sax ah? Mise waxay rabtaa madax-bannaani dhab ah? Mise weli way ku jirtaa labadiiba oo waxba uma cadda?

Madaxda Puntland waqtigan ka talisaa waxay u muuqdaan kuwa kasii fogaanaya midnimada iyo wadajirka Soomaalida, shacabkuna ku riixaya kana gadaya aragti ku dhisan gooni-goosad, abuurid nacayb iyo waddo aan la ogayn meesha ay ku dhammaanayso.

**Shacabka: Sababta ay ugu sii riixmayaan dhanka gooni-goosadka**

Shacabka reer Puntland maanta waa ay ka daaleen khilaafaadka aan dhammaan ee ka socda Soomaaliya, hoggaamiyeyaasha u adeega danaha kursiga halkii ay difaaci lahaayeen danaha gobolka, iyo indheergaradka aan weli awoodin inay sameeyaan dood mideysan oo ku saabsan xuquuqda iyo maqaamka Puntland. Daalkaas wuxuu abuuray jawi niyad jab leh oo bulshada ka dhaadhiciyey in arrimahooda aan si dhab ah loo tixgelin, isla markaana ay maqantahay aragti mideysa oo qeexda mustaqbal siyaasadeed oo caddaalad ku dhisan.

Natiijada arrintan waxay keentay in bulshada Puntland ay si tartiib tartiib ah ugu sii siqdo fikradda gooni-u-istaagga, iyadoo kalsoonidii ay ku qabeen midnimada Soomaaliyeed sii yaraanayso. Bulshadu waxay ku baraarugtay in aanay ka jirin sinnaan iyo xaqsoor ku filan oo ka tarjumaya kaalintii iyo doorkii Puntland ee aasaaska dowladnimada Soomaaliya. Aragtidan sii xoogaysanaysa waxay muujinaysaa baahida degdegga ah ee u taalla hoggaamiyeyaasha iyo indheergaradka Puntland si loo helo wadadii dib loogu dhisi lahaa kalsoonida iyo maslaxadda guud ee ummadda.

**Maxaa la gudboon hoggaanka iyo indheergaradka Puntland?**

Haddii Puntland ay rabto mustaqbal cad oo aan qalloocin, waxaa lama huraan ah in la abuuro dood furan oo dadweyne oo qeexda jihada iyo mustaqbalka ay bulshada u aragto in uu yahay kan saxda ah. Arrintani waxay ka caawinaysaa in la helo aragti mideysan oo ka fog jaahwareerka maanta muuqda.

Sidoo kale, indheergaradka Puntland waa in ay iska dhaafaan ku tiirsanaanta iyo jaahwareerka hadba isbeddellada siyaasadeed ee ka dhacaya Muqdisho, maadaama arrintaasi mararka qaarkood ay keento jaahwareer siyaasadeed oo aan ku dhisnayn danaha gobolka.

Hoggaanka Puntland-na waxaa looga baahanyahay in uu ka hormariyo danta guud ee bulshadu leedahay damaca shaqsiyeed ee muddada-gaaban. Tani waxay horseedi kartaa xasilooni siyaasadeed iyo kalsooni bulsho oo dhidib adag leh.

Ugu dambayn, bulshada Puntland waa in la siiyo hagitaan siyaasadeed iyo mid maamul oo cad, si looga baxo mugdiga iyo jaahwareerka fikir ee maanta jira, loona dhiso nidaam ku saleysan isla-xisaabtan, hufnaan iyo himilo mideysan. Hagitaan la'aanta maanta jirta ma aha keliya dhibaato maamul, balse waa khatar fikir oo saameyn toos ah ku leh jihada mustaqbalka Puntland.

Waa in si cad loo fahmaa in Puntland aysan marnaba dan ugu jirin gooni-goosad, mana ahayn ujeeddo ay ku dhisantay ama ay maanta hiigsanayso. Puntland waxaa lagu aasaasay aragti ku saleysan dib-u-dhiska dowlad Soomaaliyeed oo federaal ah, iyadoo federaalku u oggolaanayo in awoodda si caddaalad ah loo wadaago, xuquuqda gobollada la ilaaliyo, isla markaana shacabka Puntland ay si buuxda uga qayb qaataan go'aanka qaranka.

Federaalku sidoo kale waa habka keliya ee lagu xakamayn karo keli-talisnimo, takoor iyo awood-ku-koobid, waana nidaam siinaya Puntland fursad ay ku horumariso amnigeeda, dhaqaalaha iyo maamulkeeda iyada oo weli ka mid ah qarannimo wadajir ah. Taas beddelkeeda, gooni-goosadku dan uma aha Puntland, maadaama uu horseedi karo go'doon siyaasadeed, nuglaansho amni, khilaaf bulsho, kala-go' dhaqaale, isla markaana uu dhaawacayo kaalintii taariikheed ee Puntland ku lahayd midnimada iyo wadajirka Soomaaliyeed.

Haddii dood la'aan, hoggaan la'aan iyo jaahwareer fikir ay sii socdaan, waxaa jiri karta in dareenka bulshada si dabiici ah loogu leexiyo jihadaas, inkastoo aysan ka tarjumayn dan dhab ah ama aragti qaran oo fog. Sidaas awgeed, xalka saxda ahi waa dib-u-heshiisiin federaal oo dhab ah, lehna dastuur cad oo qeexaya awoodaha iyo masuuliyadaha heer kasta, si Puntland u sii ahaato tiir ka mid ah midnimada Soomaaliyeed, isla markaana ay u ilaaliso danaha jiilalka soo socda.

W/Q: Saki Rabiica

# HOOS U DHACA GANACSIGA PUNTLAND:
## SABABAHA, SAAMEYNTA IYO TALOOYIN WAX-KU-OOL AH



Bashiir Suuleey




Xigashada Sawirka: Facebook

# HORDHAC

Ganacsigu waa laf-dhabarta dhaqaalaha oo door weyn ka ciyaara kobaca dhaqaalaha, shaqo-abuurka, iyo dakhli-soo-saarka bulshada. Waxa uu si toos ah u saameeyaa nolol-maalmeedka muwaadiniinta. Puntland, oo ka mid ah maamullada ugu waaweyn ee Soomaaliya ka jira, ganacsigu waxa uu laf-dhabar u yahay dakhliga deegaanka. Muddooyinkii u dambeeyey ganacsiga Puntland ayaa ku jiray mid ka mid ah xaaladihii ugu cuslaa ee soo mara. Mid ka mid ah maamulka shirkad ka mid ah kuwa ugu waaweyn ee Puntlanad ka jira ayaa ii xaqiijiyey in shirkaddoodu ay sannadkaan gaartay halkii ugu hoosaysay ee ay abid gaarto.

Haddaba; maqaalkaan waxaan ku eegi doonnaa sababaha keenay hoos u dhacaas, saamaynta uu reebay iyo talooyin la xiriira sida wax looga qaban karo.

# SABABAHA HOOS U DHACA GANACSIGA PUNTLAND

**1. Istaagga Mashaariicdii Hay'adaha Caalamiga ah**

Cilmibaaris cinwaankeedu yahay "Saameynta kaalmada shisheeye ay ku leedahay hormarka, dowlad-dhiska iyo deggenaanshaha Soomaaliya" oo uu qoray Ibraahim Cabdulaahi Maxamed (2025) ayaa muujinaysa in mashaariicda hay'adaha caalamiga ah ay door muhiim ah ka ciyaareen kobcinta ganacsiga gudaha, iyada oo ay xoojiyeen awoodda aadanaha (human capital), kordhiyeen isticmaalka adeegyada maxalliga ah, isla markaana sare u qaadeen wareegga lacagta gudaha.

Si kastaba ha ahaatee; sannadihii u dambeeyay mashaariic badan ayaa ka istaagay Puntland, iyadoo qayb weyn oo ka mid ah hoos u dhacaas ay sabab u yihiin khilaafaadka siyaasadeed ee u dhexeeya Puntland iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya. Mashaariic badan oo ka socda gobollada kale ee dalka ayaa si toos ah uga istaagay Puntland. Arrintaas ayaana loo aanaynayaa in ay qeyb ka tahay hoos u dhaca ganacsiga deegaanka.

**2. Ganacsatada oo dalal kale u hayaamaysa**

Ganacsato badan oo reer Puntland ah ayaa deegaanka ka hayaamay, iyaga oo ganacsigooda u wareejiyay dalal dibadda ah sida Congo, Sambia, Kenya, iyo suuqyo kale. Tillaabadan waxay keentay hoos u dhac weyn oo ku yimid ganacsiga gudaha, maadaama ganacsatadaasi ay ahaayeen laf-dhabarta dhaqaalaha deegaanka.

**3. Geeddiga qoysaskii ladnaa ee Puntland**

Qeybo badan oo ka mid ah dabaqadda dhexe iyo sare ee dadka reer Puntland oo ay ku jiraan qaar ka mid ah masuuliyiin dowladeed, ayaa qoysaskooda u raray Masar, Kenya iyo dalal kale. Arrintani waxay sababtay in:

- Lacagtii gudaha lagu kharash-gelin lahaa dibedda loo xawilo.
- Adeegyadii waxbarasho, caafimaad iyo nololeed ee gudaha laga qaadan lahaa dibedda loo wareejiyo.
- Ganacsiyada maxalliga ahna ay waayaan macaamiishii dakhligoodu sarreeyay.

**4. Amni-darro iyo Annooyin Deegaannada Qaar**

Amniga gudaha iyo aanooyinka deegaannada qaar ka jira ayaa iyaguna sabab u noqday in ay ganacsiyo badan xirmaan, ganacsato badanna deegaanka ka guurto. Mudug ayaa ah tusaalaha nool ee ay amni-darradu saamaynta ba'an ku reebtay taas oo keentay in dad badan deegaanka isaga guuraan xoolahoodana miciin la bidaan meelo amni dhaama! Qodobkaanna waa mid kale oo asna qeyb ka noqon kara hoos u dhaca dhaqaale ee jira.

**5. Kororka Canshuurta**

Mid ka mid ah ganacsatada lagu waraystay cilmibaaris ciwaankeedu yahay "Examining the Puntland Private Sector on Business Environment in Garowe: Challenges and Opportunities" ayna qoreen Axmed Abshir Maxamed & Maxamuud Ciise Yuusuf 2025 ayaa sheegay in canshuurta badan ee la saaro badeecadaha dibadda laga keeno ay ku qasabtay inuu yareeyo ganacsigiisa, ka dib markii ay bulshadu awoodi waayeen in ay gataan. Cilmibaaristu waxa kale oo ay tilmaantay in fulin la'aanta sharciyada canshuuraha iyo isku dhex yaaca nidaamka canshuur qaadista ay abuureen jawi ganacsatada ku keenaya cabsi, sidoo kale na hoos u dhigaya kalsoonida

ganacsiga, caqabad weyna ku noqon kara helitaanka maalgelin cusub.

## MAXAA KA DHASHAY?

**1. Shaqo la'aan:**

Daraasadda sare ku xusan ee ay qoreen Axmed Abshir Maxamed & Maxamuud Ciise Yuusuf 2025, ayaa muujisay in qiyaastii 90% shaqooyinka Puntland ay bixiyaan ganacsiyada gaarka loo leeyahay.Ganacsiyo badan oo xirmay iyo kuwa hoos u dhac ku yimid ayaa fasaxay in badan oo shaqaalahoodii ka mid ah. Ganacsiga keliya ma ahane waxaa ayana shaqo la'aan noqday dad badan oo u shaqayn jiray hay'adaha caalamiga ah.

"Intii aan caqlisaday isma oran sidaan ayaad shaqo la'aan u noqonaysaa" waa oraah aan ka diiwaangeliyey nin saaxiibkay ah oo muddo u shaqaynayey hay'adaha caalamiga ee deegaanka ka shaqeeya kaas oo lagu wargeliyey in uu fasax shaqada ka yahay!

**2. Saamaynta adeegyada bulshada**

Inta badan jaamacadaha Puntland ayaa sanadkaan aad looga dareemayaa hoos u dhaca ku yimid is qoridda ardayda ku biiraysa waxbarashada sare, taas oo loo aanaynayo dhaqaal yarida soo wajahday qoysaska Puntland!

**3. Kordhinta saboolnimada iyo nuglaanta bulshada**

Shaqo la'aanta baahsan iyo hoos u dhaca ku yimid dakhliga qoysaska ayaa horseeday in heerka saboolnimadu si weyn u kordho. Sidoo kale waxay dhaawac culus ku tahay mustaqbalka bulshada, maadaama ay wiiqayso awoodda dhaqaale ee qoysaska.

**4.Kororka tahriibka dhallinyarada**

Is biirsashada shaqo la'aanta, rajo la'aanta iyo dhaqaale-xumadu waxay dhallinyarada ku riixday in ay tahriibka ama ka guurista dalka u arkaan ikhtiyaarka keliya ee haray. Hoos u dhaca ganacsigu wuxuu si gaar ah u yareeyey fursadihii shaqo iyo hal-abuur ee dhallinyarada, taas oo keentay in ay tiro badan oo ka mid ah awooddii shaqo iyo maskaxdii wax-soo-saarka lahayd ay dalka ka baxaan (brain drain).

## XALALKA MACQUULKA AH EE ARRINTA WAX LOOGA QABAN KARO

Sii socoshada dhiig-baxa ku socda ganacsiga Puntland waxa uu halis weyn ku yahay mustaqbalka dhaqaalaha deegaanka. Waxa uuna horseedi karaa saboolnimo baahsan oo saameysa gobolka oo dhan. Haddaba, waxa aan soo jeedin doonaa tillaabooyin qeyb ka noqon kara in arrintaas wax laga qabto waxaana ka mid ah:

1. **In aan la siyaasadayn deeqaha caalamiga ah ee deegaanka u danaynaya,**

   Si loo yareeyo saameynta istaagga mashaariicda hay'adaha caalamiga ah, waxaa lama huraan ah in aan la siyaasadayn kaalmada hay'adaha caalamiga ee danta u ah dadka iyo deegaankaba, dib-u-soo-celinta mashaariicdaasi waxay fure u noqon kartaa kobcinta awoodda aadanaha, dhaqaajinta adeegyada maxalliga ah, iyo sare u qaadidda wareegga lacagta gudaha.

2. **Dhisidda istiraatijiyad dhaqaale**

   Dowladda Puntland waa in ay dejisaa istiraatijiyad dhaqaale oo cad oo waqti-gaaban, dhexdhexaad iyo mid fogba leh, taas oo si gaar ah diiradda u saaraysa xasilinta ganacsiga iyo soo jiidashada maalgashiga. Istiraatijiyaddani waa in ay ku salaysnaataa daraasado cilmiyeysan, xog sugan, iyo la-tashi ballaaran oo ay ka qeyb qaataan ganacsatada, aqoonyahannada iyo bulshada rayidka ah.

3. **Xasillinta amniga iyo adkeynta wada-noolaanshaha bulshada**

   Amnigu waa mid ka mid ah tiirarka ugu waaweyn ee aas-aaska u ah jiritaanka iyo koboca ganacsiga. Sidaa awgeed, waa in la xoojiyo dadaallada amni, dib-u-heshiisiinta bulshada, iyo xalinta khilaafaadka bulshada deegaanka.

## GUNAANAD

Si guud waxaa hoos u dhac ballaaran ku imaanayay ganacsiga Puntland sannadihii la soo dhaafay. Hoos u dhacaasna waxa uu reebay saamayn aan la dhayalsankarin. Haddaba; arrintaasi waxa ay u baahantahay in si dhab ah loo wajaho ee aan la dhowran. Haddii aan si degdeg ah wax looga qabanna saameynta dhaqaale, bulsho iyo mid mustaqbaleed ee ay reebayso waxa ay noqon doontaa mid aan la mahadin doonin.

# SOOMAALIYA 25 SANO KA DIB:
## DHISMAHA DOWLADNIMADA SADDEXAAD, DOORASHO IYO DASTUUR LAGU MURANSAN YAHAY – MAXAA XAL U AH 2026 IYO KA DIB? QAYBTA 1-AAD



Axmex Siciid Aw-nuur



**Xigashada Sawirka**: BBC Somalia

Ma Heshiis Doorasho keliya Mise Heshiis Bulsho iyo Heshiis Doorasho labadaba?

## HORDHAC

Maqaalkan waxaa si gaar ah loogu taloggalay dhallinyarada Soomaaliyeed ee laga yaabo inaysan si qoto dheer ula socon taariikhda dowladnimada Soomaaliya, marxaladihii ay soo martay, iyo sababihii horseeday burburkii dowladihii hore. Sidoo kale, wuxuu si toos ah ula hadlayaa siyaasiyiinta Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa maanta xilalka ka haya Dowladda Federaalka iyo Dowlad-Goboleedyada, kuwaas oo mas'uuliyad weyn ka saaran tahay jihada iyo mustaqbalka dowladnimada dalka.

Dowladnimada saddexaad ee Soomaaliya, oo dib loogu yagleelay Jabuuti sannadkii 2000, ayaa weli ah mid qabyo ah inkastoo ay jirtay muddo ka badan 25 sano. Waxaa muuqata khatar ah in ay wajahdo burbur la mid ah kii dowladihii ka horreeyay, haddii aan laga baran casharradii taariikhda. Sidaas darteed, maqaalkani wuxuu isku dayayaa in uu si kooban u soo bandhigo taariikhda dowladnimada Soomaaliyeed, burburkii labadii dowladood ee hore, iyo aragti ku saleysan badbaadinta dowladnimada hadda jirta. Ujeeddadu waa in la abuuro dood furan oo loo wada dhan yahay, kana turjumaysa masiirka dowladnimo ee ummadda Soomaaliyeed.

Qaybta kowaad ee maqaalku waxay iftiiminaysaa qaab-nololeedkii iyo nidaamkii is-maamulka ee bulshada Soomaaliyeed ka hor iyo intii lagu jiray xilligii gumeysiga, aasaaskii Ururka SYL sannadkii 1943, iyo muddadii is-xukun-hoosaadka iyo maamulkii Qaramada Midoobay (1950–1960). Sidoo kale, waxaa lagu falanqeynayaa xornimadii iyo midowgii labada gobol ee 1960, burburkii dowladnimadii kowaad (1960–1969), iyo bilowgii dowladnimadii labaad ee milateriga hoggaaminayay (1969–1990). Qaybtan waxay si kooban u dul istaagaysaa wixii ka hirgalay, wixii ka qaldamay, iyo sababihii keenay burburkii labadaas dowladood.

Qaybta labaad waxay xoogga saaraysaa muddadii dagaallada sokeeye iyo qabqablayaasha dagaalka, dhibaatadii ba'anayd ee shacabku la kulmay, iyo shirarkii dib-u-heshiisiinta ee fashilmay. Waxa kale oo lagu xusayaa dhismihii Somaliland (1992–1993) iyo Puntland (1998), iyo aragtiyihii saldhigga u ahaa maamulladaas ka hor dib-u-yagleeliddii dowladnimada saddexaad ee Jabuuti. Qaybtan waxay sii faahfaahinaysaa dowladdii lagu soo dhisay Jabuuti, waxqabadkeedii, imaatinkeedii Muqdisho, iyo sida ay ku dhammaatay, iyo sidoo kale shirkii Kenya (2003–2004), doorashadii Cabdullaahi Yuusuf, u soo guuristii dowladda gudaha dalka, soo bixitaankii Maxkamadaha Islaamiga ah, shirarkii dastuurka ee Garoowe I iyo II, ansixintii dastuurka Muqdisho, iyo doorashadii 2012.

Ugu dambayn, maqaalku wuxuu isweydiinayaa su'aalaha aasaasiga ah ee weli taagan: sidee loo heli karaa dastuur, doorasho, amni, iyo dowladnimo lagu wada heshiisan yahay? Ma ku filan tahay in keliya doorasho laga heshiiyo, mise waxaa loo baahan yahay heshiis bulsho oo ka ballaaran siyaasadda? Su'aalahaas iyo talo-bixin kooban ayaa loo jeedinayaa hoggaanka siyaasadeed ee maanta talada isku haya, heer federaal, dowlad-goboleed iyo siyaasiyiin kale oo damac madaxweyne leh, si loo badbaadiyo mustaqbalka dowladnimada Soomaaliya.

## SOOMAALIDA KA HOR XILLIGII ISTICMAARKA IYO MUDADII ISTICMAARKA ( 1890-1950)

Dadka Soomaaliyeed, ka hor iyo intii lagu jiray muddadii gumeysigu yimid geyiga Soomaaliyeed, waxay ahaayeen bulsho u qaybsan qabaa'il, mid kastaana ku noolaa deegaankiisa. Bulshadu guud ahaan waxay u kala qaybsanayd saddex qaybood: bulsho reer guuraa ah oo xoolo-dhaqato u badan, bulsho deggen magaalooyin yar-yar oo xeebaha ku yaallay, iyo bulsho beeraley ah oo si gaar ah u deggenayd hareeraha webiyada. Xilligaas ma jirin nidaam dowladeed oo dhexe oo ka talinayay guud ahaan dalka, balse waxaa jiray nidaamyo bulsho oo ku dhisnaa dhaqanka, kuwaas oo ay hormuud u ahaayeen odayaasha qabaa'ilka iyo culimada, maadaama bulshada Soomaaliyeed ay ahayd bulsho Muslim ah oo si weyn ugu dheggan diinta Islaamka.

Inkasta oo uusan jirin nidaam dowladeed casri ah (modern government) oo dadka iyo dalka oo dhan ka dhexeeya, haddana meelo gaar ah waxaa ka jiray boqorro ama salaadiin xukun ka hayay dhulal xaddidan, kuwaas oo ku dhisnaa awoodo dhaqameed iyo mid diimeed.

Dhamaadkii qarnigii 18aad iyo bilowgii qarnigii 19aad, xilli ku beegnaa waqtigii gumeysigu uu kala qaybsanayay dhulka ay Soomaalidu degto, bulshada Soomaaliyeed waxay wajahaysay amni darro baahsan iyo colaado qabaa'il oo inta badan salka ku hayay khilaafaad la xiriira xoolaha, gaar ahaan geela, dilal is-daba-joog ah, iyo isu xoog-sheegasho joogto ah. Ceelasha biyaha ayaa sidoo kale ahaa meelaha ugu

badan ee lagu dagaallami jiray, maadaama ay ahaayeen il nololeed muhiim ah.

Sida ay tilmaamayaan taariikhyahannadu, markii gumeysigu yimid geyiga Soomaaliyeed, wuxuu heshiisyo la galay madaxdii qabaa'ilka Soomaaliyeed. Isagoo kaashanaya qabaa'ilkaas, gumeysigu wuxuu dagaal kula galay dhaqdhaqaaqyadii gobannimo-doonka iyo kuwa gumeysiga ka soo horjeeday. Dhaqdhaqaaqyadaas, midka ugu xoogga iyo saameynta badnaa wuxuu ahaa halgankii gobannimo-doonka ee uu hoggaaminayay Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, kaas oo gumeysigu ugu dambayn ka adkaaday sannadkii 1921.

## ASAASKII XISBIGII GOBONIMO DOONKA SOOMAALIYEED SYL 1943

Dhallinyaro tiradoodu ahayd 13 ayaa aasaasay Xisbiga SYL, waxaana muddo kooban gudaheed ku faaftay afkaarta iyo himilooyinka xisbiga dhammaan dhulka ay Soomaalidu degto ee Geeska Afrika. Ujeeddada ugu weyn ee xisbiga waxay ahayd in geyiga Soomaaliyeed laga xoreeyo gumeysiga, isla markaana la dhiso midnimo qaran oo ku saleysan dan guud.

Mabaadi'da Xisbiga SYL waxaa saldhig u ahaa la dagaallanka qabyaaladda, iyadoo lagu baaqayay in Soomaalidu joojiso kala qoqobka qabiilka, danteedana u midoobto si ay uga dul qaaddo gumeysiga. Dhallinyaradii aasaastay xisbiga waxay si qoto dheer u fahansanaayeen in qabyaaladdu tahay aaladda ugu weyn ee gumeysigu u adeegsado kala qaybsanaanta bulshada Soomaaliyeed, isla markaana ay tahay meelaha ugu nugul ee laga soo galo.

Inkasta oo bilowgii uu xisbiga SYL guul ka gaaray yareynta saameynta qabyaaladda, haddana sida taariikhdu muujinayso, qabyaaladdu waxay dib u soo laabatay lixdamaadkii, xilli uu billowday tartanka kuraasta Baarlamaanka iyo hoggaanka dowladeed. Xilligaas, qaar ka mid ah hormuudkii siyaasadda Soomaaliyeed (political elites) ayaa u adeegsaday qabyaalad xeelad ay ku gaaraan kuraas Baarlamaan iyo xilal dowladeed, taas oo si tartiib tartiib ah u wiiqday midnimadii qaran ee SYL ku taamaysay.

**Waqtigii Xxrnimo gaarsiinta iyo Maamulka Qaramada Midoobay (UN Trusteeship of Somalia (April,1, 1950- July 1-1960)**

Ka dib dhammaadkii Dagaalkii Labaad ee Adduunka iyo aasaaskii Qaramada Midoobay, waxaa bilowday dhaqdhaqaaq caalami ah oo si weyn u taageeray halgannadii xornimo-doonka ee dalalka Afrika, taas oo horseeday in qaar badan oo ka mid ah dalalkaas ay helaan xornimadooda. Dhaqdhaqaaqaas caalamiga ah waxaa hormuud u ahayd Qaramada Midoobay, iyadoo ay gadaal ka riixayeen dalal aan si toos ah uga qayb qaadan gumeysiga. Qaaradaha ugu waaweyn ee ay dalalka Yurub gumaysteen xilligaasna waxay ahaayeen Afrika, Aasiya, iyo Laatiin Ameerika.

Heshiis dhexmaray Xisbiga SYL iyo Qaramada Midoobay awgiis, dhulkii Soomaaliyeed ee uu gumaysan jiray Talyaaniga waxaa la hoos geeyay maamulkii Qaramada Midoobay, hase yeeshee Talyaaniga ayaa loo wakiishay maamulka ku-meel-gaarka ah ee xilliga xornimo-gaarsiinta. Arrintaas waxay meesha ka saartay Ingiriiska, oo markaas gacanta ku hayay inta badan geyiga Soomaaliyeed.

Markii tallaabadaas la qaaday, Ingiriisku wuxuu dhulkii uu maamulayay ee Hawdka iyo Dhulka Kaydka ah (Hawd and Reserved Area) ku wareejiyay Itoobiya, halka uu dhulka NFD—oo ay Soomaalidu degto—si toos ah ugu daray Kenya. Tallaabooyinkan waxaa si weyn loogu fasiray aargoosi siyaasadeed, maadaama Talyaanigii dagaalka lagaga adkaaday dib loogu soo celiyay maamulkii koonfurta Soomaaliya, halka Ingiriiska laga qaaday.

Arrintan ayaa dhalisay dhaleeceyn xooggan oo loo jeediyay SYL, iyadoo dad badan ku eedeeyeen in xisbigu uu ku guuldareystay fahamka duruufaha juqraafi-siyaasadeed (geopolitics) ee waqtigaas. Dhaliishaasi waxay salka ku haysay in SYL ay iyadu codsatay in Talyaaniga loo dhiibo maamulka xilliga xornimo-gaarsiinta, taas oo keentay in dhulal Soomaaliyeed oo muhiim ah ay ka baxaan gacanta Soomaalida.

**Dowladdii xukun hoosaadka Soomaalida iyo doorashadii Soomaali ugu horaysay 1956-1959**

Waxaa la sheegaa in doorashadii ugu horreysay ee uu Talyaaniga fududeeyay ay qabsoontay

sannadkii 1956, kaddib markii uu billowday is-xukun-hoosaadkii 1954, isla sannadkaasna la taagay calanka Soomaaliyeed. Doorashadaas ayaa shacabka Soomaaliyeed ku doorteen wakiillo matalayay, waxaana la dhisay Baarlamaan ka koobnaa 70 xubnood, kuwaas oo intooda badan laga soo xulay gobollada, halka qaar kalena Talyaanigu si toos ah u magacaabay.

Doorashadaas waxaa aqlabiyad cad ku guuleystay Xisbiga SYL, taas oo ka dhigtay xisbiga ugu taageerada badan Soomaaliya xilligaas. Guushaas kaddib, Mudane Cabdullaahi Ciise ayaa loo xushay inuu noqdo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumaddii Maamulka Daakhiliga ah ee Soomaaliyeed.

Sidoo kale, waxaa la magacaabay lix wasiir oo kala ahaa: Mudane Muuse Boqor oo loo magacaabay Wasiirka Arrimaha Gudaha, Mudane Salaad Cabdi Gaajo Wasiirka Maaliyadda, Mudane Sheekh Cali Jimcaale Wasiirka Arrimaha Bulshada, Mudane Xaaji Faarax Cali Cumar Wasiirka Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Mudane Maxamuud Cabdinuur Juuje oo loo magacaabay Wasiirka Hawlaha Guud. Lixdaas wasiir, laba ka mid ah—Muuse Boqor iyo Salaad Cabdi Gaajo—waxay ka soo jeedeen hal jilib-hoosaad, halka Ra'iisul Wasaaraha iyo wasiir kale ay ka soo jeedeen jilib-hoosaad kale. Tani waxay muujinaysaa in qabyaaladda maanta si weyn u saameysa siyaasadda Soomaaliya ay xilligaas aad u yarayd ama gebi ahaanba aanay jirin.

Inkasta oo muddadaas Maamulka Daakhiliga ah ay jirtay, haddana qabyaaladdu saamayn muuqata kuma lahayn siyaasadda, mana jirin tartan xooggan oo ku saleysan damac xil-doon ah. Si kastaba ha ahaatee, sida uu Cabdirisaaq Xaaji Xuseen ku xusay xusuus-qorkiisa, markii ay dadku arkeen in qofkii xilka qabta la siinayo guri dowladeed iyo gaari, ayay bilowdeen damacyo cusub oo ku aaddan hanashada xilalka dowladeed. Taas ayaa keentay in qof walba uu u ordo madaxnimo, isla markaana uu adeegsado xeelad kasta oo uu xil ku heli karo. Halkaas ayay ka bilaabatay soo laabashadii qabyaaladda, gaar ahaan qabyaaladda siyaasadeed, oo illaa maanta ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan dowladnimada Soomaaliyeed.

**Xukunkii SYL, xornimadii Soomaaliya 1960, midowgii labada gobol iyo dhimashadii dowladnimadii kowaad**

Markii la soo gaaray afartanaadkii qarnigii 20aad, waxaa abuurmay dhaqdhaqaaqii gobannimo-doonka Soomaaliyeed ee la magac baxay SYL (Somali Youth League), kaas oo la aasaasay sannadkii 1943. Dhaqdhaqaaqan gobannimo-doonka ah wuxuu si degdeg ah ugu fiday dhammaan geyiga ay Soomaalidu degto, wuxuuna noqday halgankii ugu weynaa ee horseeday in Soomaaliya ay ka xoroowdo gumeysiga. Inkasta oo SYL uu si gaar ah ugu xoog badnaa koonfurta Soomaaliya, haddana waqooyiga dalka waxaa ka jiray dhaqdhaqaaqyo iyo xisbiyo kale oo gobannimo-doon ah, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen SNL, USP, iyo ururro kale oo door muhiim ah ka qaatay halgankii xornimo-doonka waqooyiga Soomaaliya.

Dhaqdhaqaaqa SYL wuxuu mushkiladda ugu weyn ee haysatay bulshada Soomaaliyeed u arkay qabyaalad iyo kala-qaybsanaan bulsho, wuxuuna ummadda Soomaaliyeed ee ku kala noolayd guud ahaan Geeska Afrika ku abaabulay laba ujeeddo oo waaweyn: tan koowaad waxay ahayd in gumeysiga laga kiciyo dhulka Soomaaliyeed, lana xaqiijiyo xornimo qaran; tan labaadna waxay ahayd in laga fogaado qabyaaladda, maadaama ay ahayd cudur bulsho oo horseeday amni-darro, cadaalad-darro, dhac iyo boob dhex mara Soomaalida. Diidmada SYL ee qabyaaladda waxay saldhig u ahayd fahamka ay lahaayeen 13-kii dhallinyaro ee aasaastay ururka, kuwaas oo garwaaqsaday in gumeysigu si ula kac ah u kobcinayo qabyaaladda si uu bulshada u kala qaybiyo una sii adkeeyo xukunkiisa.

Dhaqdhaqaaqa SYL wuxuu soo maray marxalado kala duwan. Marxaladdii koowaad waxay ahayd marxaladda abaabulka bulshada, kicinta dareenka waddaniyadda, iyo halgankii ka dhanka ahaa gumeysiga. Marxaladdan oo ka bilaabatay aasaaskii ururka sannadkii 1943, waxay ku dhammaatay helitaankii xornimada sannadkii 1960. Marxaladdii labaadna waxay ahayd marxaladdii dowladnimada, xilligii uu Aadan Cabdulle Cismaan ahaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya (1960–1967).

Marxaladdan labaad, oo hoggaamiyihii SYL loo doortay Madaxweynaha dalka, waxaa la sii waday hirgelinta nidaam dimuqraadi ah oo ku saleysan qof iyo cod, laguna dhisay hannaan baarlamaani ah. Inkasta oo ay dowladnimadu weli ahayd mid curdin ah, isla markaana dhaqaalaha iyo aqoonta bulshada Soomaaliyeed ay aad u hooseeyeen, haddana waxaa jiray dadaal muuqda oo lagu dhisayo hay'adaha dowladeed. Si kastaba ha ahaatee, marxaladdan hore waxaa durba soo baxay kala duwanaansho fikradeed oo ka dhex dhalatay hoggaanka SYL, gaar ahaan Madaxweynaha Aadan Cabdulle Cismaan iyo Ra'iisul Wasaarihii ugu horreeyay ee xornimada kaddib, Cabdirashiid Cali Sharmaarke. Kala aragti duwanaanshahan wuxuu salka ku hayay qaabka loo wajahayo arrinta xoreynta dhulalka Soomaaliyeed ee weli gumeysigu haystay, gaar ahaan NFD iyo Soomaali Galbeed (Ogaden).

Dhacdo kale oo mudan in la xuso waxay ahayd in hoggaamiyeyaashii SYL ay inta badan wada qaateen xilalka sare ee dowladnimada, halka siyaasiyiintii ka soo jeeday gobollada waqooyi—kuwaas oo aan SYL ka tirsanayn balse matalayay shacabka waqooyiga—si muuqata loo gacan bidixeeyay. Arrintan ayaa dhalisay cabasho iyo dareen takoor ah, inkasta oo midowgii labada gobol uu ku yimid jawi waddaniyadeed oo ku dhisnaa hammiga ahaa in shanta gobol ee Soomaaliyeed la mideeyo lana dhiso hal dowlad Soomaaliyeed.

Marxaladdii saddexaad ee SYL waxay ahayd marxalad ay hormuud u ahaayeen fikradihii Cabdirashiid Cali Sharmaarke iyo hoggaamiyeyaal kale oo SYL ah, kuwaas oo aaminsanaa in haddii loo baahdo, xoog loo adeegsan karo xoreynta dhulalka Soomaaliyeed ee gumeysigu haystay, isla markaana la saxo qaladaadkii ka dhashay qaabkii loo maamulay midowgii 1960. Carada ka dhalatay arrimahaas ayaa sababtay in sannadkii 1961 ay isku dayaan afgambi dhallinyaro ka tirsanaa ciidamada qalabka sida, kuwaas oo ka caraysnaa sida midowgii loo maamulay, balse isku daygoodii wuu fashilmay, iyagana waa la xiray.

Marxaladdan saddexaad dhexdeeda, waxaa la sameeyay isbahaysi siyaasadeed oo u dhexeeyay Cabdirashiid Cali Sharmaarke iyo siyaasiyiin ka soo jeeday waqooyiga dalka oo uu hoggaaminayay Maxamed Ibraahim Cigaal. Isbahaysigaas wuxuu ku guuleystay in Cabdirashiid Cali Sharmaarke loo doorto Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya bishii Juun 1967, isagoo cod ama laba cod kaga adkaaday Aadan Cabdulle Cismaan, kaas oo si sharaf leh xilka ugu wareejiyay Madaxweynihii la doortay. Taariikhda Afrika ayuu galay Aadan Cabdulle Cismaan isagoo noqday Madaxweynihii ugu horreeyay ee si dimuqraadi ah xilka u wareejiya kaddib markii doorasho looga adkaaday.

Doorashadii 1969, si kastaba ha ahaatee, waxay noqotay doorasho si weyn loo dhaliilay, loona arkay mid ay hareeyeen musuqmaasuq iyo boob baahsan, iyadoo lagu tilmaamay doorashadii ugu musuqmaasuqa badnayd marka loo eego doorashooyinkii ka horreeyay.

Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaarke, oo ahaa Madaxweynihii labaad ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, ayaa Ra'iisul Wasaare u magacaabay Maxamed Ibraahim Cigaal. Dowladdaas waxay jirtay muddo laba sano iyo dhowr bilood ah, ilaa markii la dilay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya sannadkii 1969. Toddobaad kaddib dilkaas, ciidamada qalabka sida ayaa afgambi kula wareegay xukunka, halkaasna waxaa ku dhammaaday xukunkii SYL iyo dowladnimadii ku dhisnayd doorasho qof iyo cod ah, xorriyadda hadalka, saxaafadda madaxa-bannaan, iyo nidaamka xisbiyo badan.

Sidaas ayay ku dhimatay dowladnimadii kowaad ee Soomaaliyeed (1960–1969), waxaana bilowday dowladnimadii labaad ee Soomaaliya, oo ay hoggaaminayeen ciidamada qalabka sida (1969–1990).

**Dhalashadii dowladnimadii labaad ee Soomaaliya iyo xukunkii askarta (1969-1990)**

21-kii Oktoobar, saraakiil ka tirsanaa Ciidamada Qalabka Sida ee Soomaaliyeed, kana kala socday milateriga iyo booliska, ayaa afgambi kula wareegay xukunkii dalka. Isla markiiba waxaa la laalay Dastuurkii Jamhuuriyadda ee aftida loo qaaday sannadkii 1961, waxaana la joojiyay xorriyaddii hadalka iyo saxaafaddii madaxa-bannaanayd. Kacaanku wuxuu soo saaray laba wareegto oo ka koobnaa 13

qodob, kuwaas oo noqday saldhigga sharci ee lagu maamulay dalka.

Golihii Kacaanka, oo ka koobnaa 25 xubnood oo ahaa saraakiishii afgambiga sameeyay, ayaa hoggaanka dalka qabtay. Golahaas ayaa markii dambe u xuubsiibtay Golaha Sare ee Kacaanka, kaas oo ka koobnaa shan xubnood. Guddoomiyaha Golaha Kacaanka wuxuu ahaa Maxamed Siyaad Barre, oo ahaa hoggaamiyihii afgambiga.

Bilowgii xukunka kacaanka, waxaa la magacaabay wasiirro lagu soo xulay aqoontooda iyo xirfaddooda (technocrats), kuwaas oo loo igmaday hoggaaminta wasaaradaha. Wasiirradaas kama mid ahayn Golaha Kacaanka. Si kastaba ha ahaatee, waqti ka dib ayaa dhaqankaas laga baxay, waxaana xilalkii wasiirnimo loo magacaabay xubno ka tirsanaa Golaha Kacaanka, taas oo xoojisay milataraynta maamulka dowladeed.

Toddobadii sano ee ugu horreeyay xukunka kacaanka, dowladdu waxay qabatay hawlo waaweyn oo ay shacabka Soomaaliyeed si weyn u soo dhaweeyeen. Hawlahaas waxaa ka mid ahaa dhammeystirkii qorista afka Soomaaliga, ololihii ciribtirka aqoon-la'aanta, wax ka qabashadii abaartii ba'anayd ee dhacday 1974, iyo barnaamijkii iskaa wax u qabso ee lagu abaabulay shacabka si ay gacmahooda ugu dhistaan dalkooda. Xilligaas, xafiisyo badan oo dowladeed ayaa lagu dhisay dadaalkaas, halka maanta ay dhacdo in hay'ado shisheeye laga baryo dhismaha xafiisyada dowladda.

Si kastaba ha ahaatee, qaladkii ugu horreeyay ee ay gashay dowladnimadii labaad ee ay askartu hoggaaminaysay wuxuu ahaa caburinta siyaasadda iyo joojinta xorriyadda hadalka. Waxa keliya ee la oggolaa waxay ahayd in kacaanka la ammaano, balse ma jirin meel bannaan oo lagu dhaliilo siyaasadda dowladda ama waxqabadkeeda. Qof kasta oo ka hadla ama dhaliila xukuumadda—xitaa hadal xan ah—haddii lagu ogaado waa la xirayay. Dad badan ayaa xabsiyo lagu guray iyaga oo aan maxkamad la soo taagin, qaar kalena waa la toogtay sababo la xiriira inay ka hor yimaadeen kacaanka. Waxaa ka mid ahaa saraakiil ka tirsanaa Golaha Sare ee Kacaanka oo lagu eedeeyay inay afgambi wadeen, iyo culimo diimeed masaajidda ka naqdiyay mabda'a sinnaanta ragga iyo dumarka ee ku salaysnaa hantiwadaagga cilmiyeed, kuwaas oo iyaguna la toogtay.

Qaladkii labaad ee weyn ee kacaanku galay wuxuu ahaa dagaalkii sannadkii 1977, kaas oo dowladda Soomaaliya ku qaadday dowladda Itoobiya. Sababta dagaalka ayaa lagu sheegay in la doonayay xoreynta dhulka Soomaali Galbeed (Ogaden), oo Ingiriisku ku wareejiyay Itoobiya sannadkii 1948, ka hor inta aan Soomaaliya xornimada qaadan. Dagaalkaas wuxuu horseeday burburkii dowladnimadii labaad ee Soomaaliyeed, maadaama ciidamadii burbureen, dhaqaalihii dalka hoos u dhacay, afgambi la isku dayay kaddib jabkii dagaalka, hub badanna uu galay gacanta shacabka, taas oo sii daciifisay awooddii dowladda.

Qaladkii saddexaad ee kacaanku sameeyay wuxuu ahaa in aan la diyaarin qorshe isbeddel siyaasadeed oo dalka u horseeda kala guur nabadeed. Halkii laga abuuri lahaa hannaan dimuqraadi ah oo beddel u noqda xukunka milatariga, Madaxweynihii ayaa ku dhegganaa xukunka ilaa madaxtooyada si xoog ah looga soo galay, xilli dalkii intiisa kale burbur ku jiray. Arrin kale oo mudan in la xuso waxay ahayd jabhadihii hubeysnaa ee ku dhisnaa qabyaaladda, kuwaas oo samaysmay kaddib dagaalkii 1977, kana dhigtay Itoobiya saldhiggooda. Jabhadahaas ayaa door weyn ka qaatay, isla markaana dedejiyay, burburkii dowladnimadii labaad ee Soomaaliya.

**Burburkii dowladnimadii labaad ee Soomaliyeed iyo wixii ka dhashay 1991-1999)**

Burburkii Jamhuuriyaddii labaad ee Soomaaliya (1969–1990), oo loo yaqaanay dowladdii kacaanka ee ay askartu hoggaaminaysay, wuxuu sababay barakac baahsan, dilal, iyo bililiqo aan horay loo arag. Dowladdan ayaa xukunka dalka kula wareegtay afgambi dhacay 21-kii Oktoobar 1969, kaddib dilkii Madaxweynihii labaad ee Soomaaliya, Mudane Cabdirashiid Cali Sharmaarke, oo la dilay 13-kii Oktoobar 1969.

Burburka dowladdan kaddib, shacabka Soomaaliyeed waxay wajahayeen barakac ballaaran, iyagoo u kala qaxay gudaha dalka iyo dibaddiisaba. Waxaa burburay ilihii nolosha ee ay ku tiirsanaayeen, sida ganacsigii, shaqooyinkii dowladda, iyo kuwii gaarka loo lahaa. Waxaa billowday dagaallo sokeeye oo ka dhacayey dhul ballaaran oo u dhexeeya Gaalkacyo ilaa xadka Kenya, kuwaas oo saameyn culus ku yeeshay inta badan koonfurta Soomaaliya.

Magaalada Muqdisho iyo magaalooyin kale

oo dalka ah waxaa si baahsan loo bililiqeystay xafiisyadii dowladda, waxaana la burburiyay ama la waayay xogtii iyo diiwaannadii yaallay hay'adaha dowladda. Xafiisyadii dowladda, dugsiyadii, jaamacadihii, iyo xeryihii ciidamada ayaa noqday kuwo ay degeen dad barakacayaal ah, halka hanti kasta oo dowladeed bilowgiiba la bililiqeystay.

Magacii iyo jiritaankii dowladda Soomaaliyeed ee caalamku aqoonsanaa wuu baaba'ay, waxaana beddelay jabhado hubeysan oo ku dhisnaa qabiil iyo qabqablayaal dagaal oo iska soo horjeeday. Rajadii shacabka Soomaaliyeed aad ayay hoos ugu dhacday; dad badan ayaa dalka ka qaxay oo doortay nolol qaxooti dalal shisheeye ah, halka qaar kalena ay u barakaceen goobo gudaha dalka ah oo ay u arkayeen meel ay ku badbaadi karaan.

Muddo kooban kaddib, macaluul iyo gaajo ba'an ayaa ka dilaacday inta badan koonfurta Soomaaliya, iyadoo gobolka Bay uu noqday meesha ugu daran, halkaas oo la soo weriyay in dadku ay caws iyo harag u isticmaaleen cunto ahaan. Arrintaas ayaa horseeday faragelin caalami ah, gaar ahaan hawlgalkii la magac baxay Hawlgalka Soo Celinta Rajada, oo uu hoggaaminayay Maraykanka. Ujeeddada rasmiga ah ee hawlgalkaas ayaa lagu sheegay gargaaridda dadka macaluushu saamaysay, hase yeeshee waxaa sidoo kale jiray dadaallo la xiriiray dib-u-yagleelidda dowladnimada Soomaaliya. Xilligaas ayay Qaramada Midoobay u dirtay Soomaaliya ergaygeedii ugu horreeyay.

Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay wuxuu soo saaray go'aammo dhowr ah oo lagu ilaalinayo midnimada iyo madaxbannaanida dhulka Soomaaliyeed, laguna mamnuucayo kala goyn dhuleed. Sidoo kale, waxaa la saaray cunaqabatayn hub, Soomaaliya-na waxaa loo aqoonsaday dal aan dowlad shaqeysa ka jirin, waxaana lagu daray Cutubka 7aad ee Qaramada Midoobay, xaalad ay weli ku jirto ilaa maanta. Ku jirista Cutubkan waxay ka dhigan tahay in Soomaaliya loo arko dal aan weli awood u lahayn inuu si buuxda u maamulo dadkiisa iyo dhulkiisa, isla markaana weli khatar ku ah nabadda caalamka.

Markii Maxamed Siyaad Barre uu ka baxay Muqdisho, garab ka mid ah jabhaddii USC ayaa ku dhawaaqay in Cali Mahdi Maxamed loo doortay Madaxweynaha Soomaaliya. Dad badan ayaa tallaabadaas ku tilmaamay mid degdeg ah, iyagoo aaminsanaa in ay ka habboonayd in la qabto shirweyne qaran oo Soomaaliyeed, laguna qabto Muqdisho, laguna martiqaado dhammaan beelaha Soomaaliyeed. Mas'uuliyaddaas waxaa si gaar ah looga sugayay USC iyo beesha Hawiye oo markaas caasimadda gacanta ku haysay, balse arrintaasi ma dhicin.

Dhanka kale, General Maxamed Faarax Caydiid wuxuu bilaabay dagaallo uu ku qaaday gobollada Kismaayo iyo Gedo, taas oo sababtay barakac baahsan oo ku dhacay dad badan, gaar ahaan kuwa ka soo jeeday beelaha Daarood. Caydiid wuxuu ku andacoonayay inuu doonayay inuu dalka ka saaro Siyaad Barre, oo markaas ku sugnaa gobolka Gedo. Inkasta oo dad badani ay rajo ka qabeen in ay dib ugu laabtaan Muqdisho kaddib bixitaankii Siyaad Barre, haddana rajadaas waxaa burburiyay falal isir-qabiil ku saleysan oo ka dhacay caasimadda, halkaas oo guryo iyo hanti si gaar ah loogu beegsaday dad qabiil gaar ah, dad badanna la dilay hayb ahaan.

Arrintaas waxaa sii xumeeyay markii Maxamed Siyaad Barre uu isna isku dayay inuu mar kale ku soo laabto talada dalka, isagoo markan adeegsanaya dareen qabiil. Waxaa sidoo kale jiray tartan siyaasadeed oo aad u xooggan oo u dhexeeyay General Caydiid iyo Cali Mahdi Maxamed, kuwaas oo si weyn u kala aragti duwanaa. General Caydiid wuxuu aaminsanaa inuu isagu ahaa ninkii xukunka ka tuuray Siyaad Barre, sidaas darteedna uu xaq u lahaa hoggaanka dalka, halka siyaasiyiin badan ay ka cabsanayeen in mar kale lagu noqdo xukun milatari.

Khilaafkaas ayaa sababay kala jab ku yimid jabhaddii USC, taas oo laga filayay inay hoggaamiso shir qaran oo dib-u-heshiisiin ah. General Caydiid, kaddib ridistii Siyaad Barre, wuxuu isku dayay inuu xoog ku qabsado koonfurta Soomaaliya, laga bilaabo Gaalkacyo ilaa xadka Kenya. Isaga iyo taageerayaashiisa waxay isku dayeen inay xoog ku maquuniyaan qabaa'il kale, balse dadaalladaas ma aysan suurtagelin, taas oo sii hurisay colaaddii sokeeye iyo burburkii guud ee dalka.

**Maxaan ka baran karaa taariikhada dhimashadii labadii dowladood ee Soomaaliya 1960-1990?**

SYL iyo dowladnimadii Soomaalida 1960-1969), (jamhuuriyadii kowaad)

- Dhaqdhaqaaqii SYL wuxuu Soomaaliya u horseeday nidaamka qof iyo cod, wuxuuna hirgeliyey nidaam dowladnimo oo ku dhisan xisbiyo badan, kaas oo ahaa hannaan ay inta badan dunida horumartay ku dhaqanto. Xorriyadda hadalka iyo saxaafadda ayaa bannaanayd, waxaana lagu heshiiyey dastuur ku saleysan nidaam baarlamaan ka dib afti loo qaaday sannadkii 1961.

- Nidaamka dowladeed ee la hirgeliyey wuxuu ahaa mid laga dhaxlay gumeysiga (post-colonial government), kana tarjumayay qaab-dhismeedka dowladnimo ee casriga ah, kaas oo awoodda xukunka u xilsaaraya shacabka, laguna helo doorasho ku dhisan qof iyo cod.

- Xilligii is-xukun-hoosaadka, Qaramada Midoobay iyo SYL waxay ku guuldarreysteen faham sax ah oo ku saabsan juqraafi-siyaasadeedka (geopolitics), kaddib markii ay aqbaleen in Talyaaniga loo dhiibo xornimo-gaarsiinta, halkii Ingiriiska loo dhiibi lahaa. Arrintaas ayaa ka careysiisay Ingiriiska, taas oo keentay in uu qaybo ka mid ah dhulka Soomaaliyeed ku daro dalal deris ah—arrin illaa maanta taagan—taas oo caqabad weyn ku noqotay riyadii ahayd xoreynta iyo mideynta dhammaan dhulka ay Soomaalidu degto ee Geeska Afrika, riyo maanta u muuqata mid baaba'day.

- Dad badan ayaa qaba in sababta SYL ku kalliftay inay Talyaaniga doortaan, isla markaana ay Ingiriiska uga leexdaan, ay ahayd cabsi ay ka qabeen awoodda ballaaran ee Ingiriiska iyo suurtagalnimada inuu dib u sii hayo gumeysi. Dooddaas, si kastaba ha ahaatee, ma ahayn mid sax ah, maadaama Ingiriisku xilligaas dalal badan oo uu gumaysan jiray u oggolaaday xornimo.

- Midowgii labada gobol ee xoroobay si wanaagsan looma maamulin, taas oo keentay in dad badan oo reer waqooyi ah ay dareemaan in la gacan bidixeeyay, halka siyaasiyiintii koonfurta ay inta badan isku koobeen xilalkii sare ee dowladnimada.

- Xisbiyadii siyaasadeed ee la aasaasay kaddib xornimada badankood kuma dhisnayn aragti iyo mabda' siyaasadeed, balse waxay u jireen keliya in lagu gaaro xukun. Taas beddelkeeda, waxaa dib loo soo nooleeyay qabyaaladdii iyo kala-qaybsanaantii qabiil ee SYL hore uga digtay bulshada Soomaaliyeed. Siyaasi kasta oo kursi Baarlamaan doonayay wuxuu furtay xisbi qabiil ku saleysan, waxaana siyaasadda qabyaaladda ku dhisan ay noqotay dhibaato weli xal loo la'yahay.

- Maaddaama dowladnimada Soomaaliyeed ay ahayd mid curdin ah, qalad ayay ahayd in qaar ka mid ah hoggaamiyeyaashii SYL ay qaataan aragti ku saleysan in xoog ciidan lagu xoreyn karo dhulalka Soomaaliyeed ee gumeysigu ku daray dalal kale. Fikirkaas wuxuu abuuray colaad dibadeed, maadaama dowladaha waaweyn iyo dalalkii Afrika ee xoroobay aysan marnaba raalli ka ahayn wax ka beddelidda xuduudihii uu gumeysigu ka tegay.

- SYL waxay sidoo kale ku guuldarreysatay inay dejiso siyaasad cad oo lagula dagaallamo musuqmaasuqa, taas oo keentay in laaluushku ku faafo siyaasadda, isla markaana ay soo baxdo siyaasad ku dhisan ganacsi iyo lacag. Dhaqankan ayaa weli saameyn ku leh siyaasadda Soomaaliyeed, iyadoo siyaasiyiin kursi doon ah ay adeegsadaan lacag dibadda laga keenay si ay u helaan xilal.

- Doorashadii 1969 waxay ahayd doorasho ay hareeyeen musuqmaasuq iyo boob baahsan. Ma jirin diiwaan-gelin rasmi ah oo cod-bixiyeyaasha ah, kuraasta Baarlamaankuna kuma salaysnayn tirada dadka degan degmooyinka. Qaladkan, oo asal ahaan ka yimid nidaamkii gumeysiga, ayay SYL ku guuldarreysatay inay saxdo.

- Xilligaas ma jirin tiro-koob qaran oo lagu kalsoonaan karo. Haddii uu jiray mid la sameeyey intii gumeysiga lagu jiray, ma ahayn mid lagu dhisi karo qorshe dowladnimo oo sax ah.

- Tartanka u dhexeeyay hormuudka siyaasadda Soomaaliyeed, oo ku saleysnaa damac kursi balse aan ku dhisnayn aragti iyo mabda' siyaasadeed, ayaa si weyn u dedejiyey burburkii dowladnimadii kowaad ee Soomaaliya. Isla dhaqankaas ayaa weli caqabad ku ah dhismaha dowladnimo waarta, xitaa kaddib 25 sano oo ay dowladnimada Soomaaliyeed weli qabyo tahay.

## XUKUNKII ASKARTA 1969-1990 (JAMHUURIYADDI LABAAD) EE SOOMAALIDA

Xukun ku dhisan caburin, xoog iyo cadaadis marna ma noqon mid ay Soomaalidu aqbasho, aakhirkiina xukun noocaas ahi wuxuu ku dambaynayaa burbur. Sidoo kale, xukun la isku dhejiyo oo lagu dagaallamo in kursiga lagu sii fadhiyo waligiis xal ma keeno, balse wuxuu sii hurinayaa qalalaase iyo kala qaybsanaan.

Inkasta oo kacaanku bilowgiisii diiday qabyaaladda, sida SYL hore u sameysay, haddana dhammaadkii xukunkiisu wuxuu ku soo ururay qabyaalad, taas oo gaartay heer aad u xun oo aan si fudud looga soo kaban karin. Qabyaaladdu waxay noqotay tiir lagu sii joogteeyo xukunka, halkii ay ahaan lahayd dhibaato la dabar-gooyo.

Sidoo kale, inkasta oo kacaanku bilowgiisii la dagaallamay musuqmaasuqa, haddana ugu dambayn wuu aqbalay, wuxuuna ka dhigay wax caadi ah. Boobkii ugu ballaarnaa ee hanti dowladeed ayaa xilligaas dhacay, waxaana abuurmay dhaqan ah in la yiraahdo: “Haddii kacaanku aqbalayo, qof walba ha qaato wixii uu awoodo.” Dhaqankaas wuxuu si weyn u wiiqay kalsoonidii dowladnimada.

Dagaalkii 1977 wuxuu noqday bilowgii burburka dowladnimadii labaad ee Soomaaliya. Dagaalkaas wuxuu sababay burbur dhaqaale, kala daadashada hay'adihii amniga, hubkii oo galay gacanta shacabka, iyo in qaar ka mid ah ciidamada ay isku dayaan afgambi, taas oo sii daciifisay dowladdii jirta.

Siyaasad ku dhisan qabyaalad ayaa horseeday in jabhado qabiil ku saleysan ay is abaabulaan, isla markaana ay dagaal la galaan dowladda. Taasi ugu dambayn waxay keentay in dowladdii si qabiil ku dhisan loo rido, taladiina ay faraha ka baxdo, dhibaato weli aan xal rasmi ah loo helin. Sidaas darteed, qabyaaladdu iyo qabiilku waxay noqdeen mushkiladda ugu weyn ee haysata dowladnimada Soomaaliyeed, una baahan xal qaran oo waara.

Sida uu buuggiisa ku xusay Cabdiraxmaan Baadiyow, mushkiladda dowladnimada Soomaaliya haysata waxay ku saleysan tahay afar arrimood oo waaweyn: siyaasad qabiilaysan, siyaasad ganacsiyeysan, siyaasad dibadeed ku tiirsan, iyo siyaasad xoog ku dhisan. Afartaas dhammaantood waxay u baahan yihiin xal qoto dheer si loo helo dowladnimo dhab ah oo Soomaaliyeed.

Siyaasiga Soomaaliyeed, qabyaaladdu waa tabta koowaad ee uu xukunka ku raadsado; laaluushku waa tab labaad; taageero iyo maalgelin dibadeed oo laga helo dalal shisheeye waa tab saddexaad; halka adeegsiga xoogga uu noqdo tabta ugu dambaysa marka uu is leeyahay xukunka waa ku heli karaa. Inta dhaqamadaas la beddelin, rajada dowladnimo waarta oo Soomaaliya ka hanaqaadda waxay ahaan doontaa mid aad u nugul.

W/Q: Axmed Siciid Aw-nuur

# DOORKA CILMI-BAARISTA EE WAXBARASHADA SARE EE SOOMAALIYA



Cabdiraxmaan Maxamuud Siciid



**Xigashada Sawirka**: ESEI

## HORDHAC

Cilmi-baaristu waa tiirka ugu muhiimsan ee horumarinta waxbarashada sare, kobcinta aqoonta, iyo soo saarista xalal waara oo bulshada u adeegaya. Soomaaliya, oo muddo dheer wajahaysay colaado sokeeye, barakac, iyo dhaqaale xumo, waxay weli ku jirtaa marxalad dib-u-dhis ah. Waxbarashada sare, gaar ahaan jaamacadaha, waxay ka mid yihiin awoodaha ka qayb qaadan kara dib-udhiska dalka iyo soo saarista cilmi-baarisyo jihayn kara mustaqbalka dalka. Hase yeeshee; xaqiiqda maanta waxay muujinaysaa in cilmi-baarista dalka ay tahay mid hoosaysa si buuxdana aan kaalin uga qaadan karin horumarka bulshada iyo siyaasadaba.

Waxaa muhiim ah in la fahmo in cilmi-baarista goobaha waxbarashada sare aysan keliya ku koobnayn qorista buugaag ama maqaal cilmiyeed, balse ay tahay hab wax ku ool ah oo lagu ogaado baahiyaha dhabta ah ee bulshada, laguna soo saaro xalal waara oo ka jawaabaya arrimaha caafimaadka, waxbarashada, amniga, dhaqaalaha, iyo deegaanka.

Maqaalkaan wuxuu diiradda saarayaa heerka cilmi-baarista ee Soomaaliya iyo xaaladda guud, saamaynta cilmi-baaristu ku leedahay jaamacadaha, caqabadaha haysta cilmi-baarista Soomaaliya iyo fursadaha lagu horumarin karo cilmi-baarista Soomaaliya,

## HEERKA CILMI-BAARISTA EE SOOMAALIYA IYO XAALADDA GUUD

Heerka cilmi-baarista ee Soomaaliya waxay weli ku jirtaa marxalad soo kabasho, waxaana si cad u muuqata in wax-soo-saarka cilmiyeed iyo maalgelinta cilmi-baarista iyo horumarinta ay aad u hooseeyaan marka loo eego wadamada kale ee adduunka iyo gobolkaba. Sida lagu sheegay warbixinno kasoo baxday "UNESCO" iyo "Our World in Data", Soomaaliya waxay leedahay qiyaastii 0.1–0.5 cilmi-baare halkii milyan oo qof, halka wadammada Afrika ee horumarsan sida South Africa ay gaaraan ~900 cilmi-baarayaal halkii milyan oo qof, adduunka oo dhanna celceliskiisu yahay 1,200 cilmi-baare halkii milyan qof (UNESCO, 2022; Our World in Data, 2023). Tani waxay muujinaysaa farqi aad u weyn oo u dhexeeya Soomaaliya iyo wadammada kale, taasoo saameyn toos ah ku leh awoodda dalka ee wax-soo-saarka aqooneed iyo cilmiyeed ee caalamiga ah.

Inta badan cilmi-baarisyada Soomaaliya laga sameeyo waxaa sameeya hay'ado caalami ah, waxaana daabacaadaha ugu badan ee laga helo PubMed iyo PMC ku saabsan yihiin caafimaad, iyadoo in ka badan 80% qoraaga koowaad (First Author) ay yihiin cilmi-baarayaal aan Soomaali ahayn. Tirada maqaalada la daabacay ee Soomaaliya ee PubMed iyo joornaalada caalamiga ah sanadkii 2023 waxay gaarayaan kaliya tobaneeyo, halka wadammada gobolka sida Kenya iyo Ethiopia ay leeyihiin boqolaal maqaal oo sanadkii la daabaco.

Barbardhigga gobolka, Soomaaliya waxay ka hooseysaa dalalka deriska ah marka la eego tirada jaamacadaha, xarumaha cilmi, iyo maalgelinta cilmibarista iyo horumarinta. Tusaale ahaan, Kenya waxay leedahay in ka badan 70 jaamacadood oo leh xarumo cilmi-baaris oo qalabaysan iyo nidaamyo horumarineed oo shaqeynaya, halka Ethiopia ay sanadkii 2022 daabacday in ka badan 1,200 maqaal oo cilmiyeed (Nature Index, 2023). Marka loo eego adduunka, wadammada sida Maraykanka, Jarmalka iyo Japan waxay maalgeliyaan cilmi-baarista iyo horumarita qiyaastii 2–3% GDP, halka Soomaaliya aysan weli lahayn xog rasmi ah oo muujinaysa maalgelinta cilmi-baarista iyo horumarita (UNESCO, 2022).

Si kastaba ha ahaatee; waxaa jira koror yar oo cilmi-baaris gudaha ah oo sanadihii u dambeeyay muuqday, gaar ahaan daraasadaha caafimaadka iyo arrimaha bulshada, waxaaa kale oo jiray shirarka cilmiyeed ee ay jaamacadaha iyo hay'adaha caalamiga ah qabteen (UNICEF Somalia, 2024; SoDMA, 2023). Xog-ururinta iyo nidaamka cilmi-baarista Soomaaliya waxaa weli loo baahanyahay in la xoojiyo, iyadoo muhiim ay tahay in la helo maalgelin joogto ah, tababaro xirfadeed, xarumo cilmi oo qalabaysan, iyo hannaan qaran oo xog-ururin ah, si dalka uu ula jaanqaado heerarka gobolka iyo caalamka.

## SAAMAYNTA CILMI-BAARISTU KU LEEDAHAY JAAMACADAHA

Jaamacaduhu waxay leeyihiin door aas-aasi ah, sida waxbarid, cilmi-baaris iyo soo saarista aragtiyo iyo aqoon cusub, hal-abuur iyo curin, faham iyo ka-qaybgal bulsho, iyo adeeg bulsho. Inkastoo waxbaristu ay tahay tan ugu muhiimsan, haddana dad badan oo ka baxsan jaamacadaha si fiican uma fahmaan doorka cilmi-baarista. Arrintani waxay keentay faham-darro ku saabsan sida jaamacaduhu uga gaabiyaan dhiirigelinta cilmi-baarista. Jaamacadaha qaarkood waxay lumiyaan qoondada lacageed ee cilmi-baarista, iyagoo u arka waxbaridda inay tahay shaqada keliya

ee jaamacaddu leedahay. Taasi waxay keentay hoos u dhac ku yimaadda wax soosaarka iyo hal-abuurka jaamacadaha, kalsoonida iyo taageerada loo hayo jaamacadaha.

Iyadoo taasi jirto haddana waxaa jira jaamacado dadaal dheeraad ah ku bixiya cilmi-baarista, iyadoo ay jiraan suaalo jawaab u baahan: maxay jaamacaduhu ugu hawlan yihiin cilmi-baaris aan lagu dhaqmayn natiijooyinka kasoo baxa? Yaa ka faa'iideysta? Maxayse muhiim u tahay? Dhammaantood waa su'aalo macquul ah, jawaabahooduna ma adka. Runtu waxay tahay in nidaamka cilmi-baarista jaamacaduhu uu yahay mid si fudud loo fahmi karo, isla markaana leh saameyn aad u weyn.

Ujeeddadu waa in la caddeeyo oo la sharraxo cilmi-baarista jaamacadaha, si loo abuuro faham wanaagsan iyo xiriir xooggan oo u dhexeeya bulshada iyo waxbarashada sare. Arrintani waa mid lama huraan u ah mustaqbalka jaamacadaha.

Jaamacaduhu cilmi-baaris ayay sameeyaan maadaama ay qayb ka tahay himiladooda waxbarasho iyo helidda aqoon cusub, waxaase muhiim ah in la adeegsado oo dowladda iyo ha'yadaha gaarka ahba ku go'aan qaataan xog. Cilmi-baaristu si toos ah iyo si dadbanba waxay u taageertaa waxbaridda, jaamacado badan waxay u arkaan cilmi-baarista iyo aqoon-kororsiga inay yihiin waajibaad muhiim ah, in ay dareemaanna waxy qayb ka noqonaysaa in la hormariyo cilmi-baarista. Xuduudaha u dhexeeya noocyadan cilmi-baariseed way sii baaba'ayaan, taasoo faa'iido u leh fahamka dhibaatooyinka adag ee casriga ah iyo horumarinta culuum isku dhafan, Horumarinta aqoonta, hal-abuurnimada, iyo curinta cusub waa laf-dhabarta horumarka ilbaxnimada iyadoo aan ognahay in jaamacaduhu hoy u yihiin aqoonyahanno, khuburo, iyo dad si wadajir ah uga shaqeeya soo saaridda aqoon cusub.

## DOORKA DOWLADDA FEDERALKA SOOMAALIYA IYO DOWLAD GOBOLEEDYADA EE CILMI-BAARISTA

Dowladda Soomaaliya waxay leedahay mas'uuliyad ku aaddan horumarinta cilmi-baarista waxbarashada sare, hase yeeshee taageeradu waa mid aad u hoosaysa amaba ma jirto. Go'aannada la xiriira waxbarashada, caafimaadka, iyo horumarinta bulshada ayaa weli ku saleysan qiyaas iyo aragtiyo hore, halkii ay ku saleysan lahaayeen xog iyo cilmi sugan (Data-driven decisions).

Heerka Dowladda Federaalka, wasaaradaha sida Wasaaradda Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare, Wasaaradda Qorsheynta, iyo wasaarado kale oo farsamo, waxaa laga filayay inay hoggaan u noqdaan dejinta siyaasad qaran oo cilmi-baaris, samaynta xog-ururin rasmi ah, iyo dhiirrigelinta go'aan-qaadasho ku saleysan caddeyn (evidence-based policy). Si kastaba ha ahaatee, xaqiiqadu waxay tahay in wasaaradaha badankoodu aysan lahayn waaxyo cilmi-baaris oo si buuxda u shaqeeya, cilmi-baareyaal joogto ah, ama miisaaniyad u gaar ah cilmi-baarista. Xogta la adeegsado inta badan waa mid kooban, mararka qaarna waxay ku xiran tahay warbixinno ay diyaariyaan hay'ado caalami ah ama la-taliyayaal dibadeed, taas oo yareyneysa lahaanshaha iyo ku habboonaanta natiijooyinka cilmi-baarista.

Dib-u-furista Jaamacadda umadda Soomaaliyeed (Somali National University) sanadkii 2014 waxay ahayd tillaabo muhiim ah oo muujinaysa rabitaanka dowladda ee soo celinta kaalinteedii tacliinta sare iyo cilmi-baarista. Hase yeeshee, jaamacaddu weli waxay wajahaysaa caqabado la xiriira maalgelin, kaabayaal cilmi-baariseed, iyo awoodda macallimiinta, taas oo xaddidaysa doorkeeda cilmi-baariseed.

Dhanka dowlad-goboleedyada, doorku wuxuu u egyahay kan Dowladda Federaalka, balse mararka qaar wuu ka sii xaddidan yahay. Dowlad-goboleedyadu guud ahaan waxay diiradda saaraan arrimo degdeg ah sida amniga, adeegyada aasaasiga ah, iyo maamulka, halka cilmi-baaristu aysan ka mid ahayn mudnaanta koowaad. Wasaaradaha heer maamul-goboleed badankoodu ma laha nidaam xog-ururin rasmi ah, mana jiraan hay'ado cilmi-baaris oo ay dowlad-goboleedyadu si toos ah u maamulaan ama u maalgelinayaan. Cilmi-baarista laga sameeyo gobollada inta badan waxaa fuliya hay'ado aan dowli ahayn (NGOs), xarumo cilmi-baaris oo madaxbannaan, ama jaamacado gaar loo leeyahay, kuwaas oo inta badan ku shaqeeya ajendayaal deeq-bixiye.

## CAQABADAHA HAYSTA CILMI-BAARISTA SOOMAALIYA

Caqabadaha ugu waaweyn ee cilmi-baarista waxbarashada sare ee Soomaaliya inkasta oo ay aad u badanyihiin waxaase ku soo koobi karnaa: b) dhaqaale-xumo, t) kaabayaasha cilmi-baarista oo aad u hooseeya, j) ma jiraan laabab lagu sameeyo cilmi-baarisyada u baahan laabka (experimental studies), x) iskaashi la'aanta ururada cilmi-baarisyada ee ka jira

dalka kh) kaadirka Soomaaliyeed ee waqtigiisa geliyay wabarashada iyo cilmi-barista oo kooban marka loo eego wadammada gobolka iyo caalamka, d) tababar la'aan dhinaca xirfadaha cilmi-baarista ee macallimiinta iyo ardayda, r) dhaqan cilmiyeed oo aan si buuxda u dhisnayn iyo s) in mudnaanta la siiyo waxbarid buugta ku saleysan halkii cilmi-baaris dhab ah laga horumarin lahaa.

## FURSADAHA LAGU HORUMARINKARO CILMI-BAARISTA SOOMAALIYA

Inkasta oo xaaladda cilmi-baarista ay hoosayso, haddana waxaa jira fursado dhowr ah oo la adeegsan karo: b) Tirada dhalinyarada oo badan waxay ka dhigan tahay awood cilmiyeed cusub oo la horumarin karo, t) tiknoolajiyadda waxay fursad u yihiin jaamacadaha si ay u sameeyaan cilmi-baaris tayo leh.

Shirar cilmi-baaris oo la qabtay ayaa muujiyay in inkastoo caqabado jiraan, haddana ay jiraan dadaallo wax ku ool ah oo lagu horumarin karo cilmi-baarista Soomaaliya. Mashruucyo ku saleysan baahida bulshada sida caafimaadka, waxbarashada, iyo deegaanka ayaa fursad siinaya jaamacadaha inay noqdaan xarumo aqoon-soo-saar oo wax ku ool ah. Iskaashiga jaamacadaha gudaha iyo kuwa caalamiga ah ayaa sidoo kale dhiirrigelin kara daabacaad cilmiyeed iyo tababarro xirfadeed oo joogto ah.

## TALO SOO JEEDIN

Si cilmi-baaristu u noqoto mid wax ku ool ah; maqaalkaan waxa ku soo jeedinayaa tallooyin lagu hormarinkaro cilmi-baarista Soomaaliya: b) jaamacaduhu waa in ay yeeshaan siyaasado cad oo cilmi-baaris, dhisaan joornaallo maxalli ah oo daabaca cilmi-baarista, maalgeliyaan tababarro xirfadeed, dhiirrigeliyaan cilmi-baaris ku saleysan baahiyaha dhabta ah ee bulshada, isla markaana abuuraan iskaashi u dhexeeya jaamacadaha, dowladda, iyo warshadaha gaarka loo leeyahay. t) in la xoojiyo awoodda dhalinyarada, la adeegsado tiknoolajiyadda casriga ah, lana dhiso xarumo cilmi-baaris oo tayo leh si ay u noqdaan meel lagu ururiyo xogta, tababarradana lagu bixiyo. j) Dowladda Soomaaliya heer federal iyo heer maamul goboleedba waa inay cilmi-baarista dhiirigeliyaan siyaasad qaranna ka yeelatao, waana inay go'aamadeeda ku salaysaa cilmi-baarisyada dhalinyarada iyo aqoonyahanka Soomaaliyeed samaynayaan.


## GUNAANAD

Cilmi-baaristu waa mid ka hoosaysa waxbarashada sare ee Soomaaliya sidii la rabay inay ahaato. Iyadoo aan la eegin dadaallada jira, waxaa muhiim ah in la aqoonsado baahida loo qabo maalgelin joogto ah, tababarro xirfadeed, iyo dhisidda kaabayaal cilmiyeed oo tayo leh. Haddii tillaabooyinkan la qaado, cilmi-baaristu waxay noqon kartaa mid wax ku ool ah oo lagu horumarin karo jaamacadaha, bulshada, iyo guud ahaan dalka, waxayna ka dhigi kartaa jaamacadaha hormuudka isbeddelka aqooneed iyo horumarinta bulshada.

W/Q: Cabdiraxmaan Maxamuud Siciid

# QORSHAYAASHA LAGU BURBURIYO BULSHOOYINKA:

## XEELADAHA LA ADEEGSADO IYO SIDA LOOGA HOR-TAGI KARO



Dr. Maxamed Cali Faarax



Xigashada Sawirka: mediasuasionUNM

# HORDHAC

Bulshooyinku waa tiirka aasaasiga ah ee ay ku dhisantahay ilbaxnimada iyo ummaduhuba. Hase yeeshee, bulshooyinkaas marna kama nabad-galaan isku dayo lagu doonayo in lagu wiiqo, lagu kala furo-furo, ama lagu burburiyo dhidibkooda akhlaaqeed, bulsho iyo dhaqan. Isku dayadaasi waxay noqon karaan kuwo ka imaanaya dibedda, ama kuwo gudaha ka bilaabma—iyada oo loo marayo siyaasad, dhaqammo ama habab si tartiib-tartiib ah u daciifiya bulshada.

Burburka bulsho iyo fur-furkeedu wuxuu u baahanyahay muddo aan ka yarayn 18-21 sano, si loo abuuro jiil xambaara fikradda lagu burburinayo diinta, xadaaradda iyo dhaqanka bulshada, ha u sameeyo si ula kac ah ama isagoon dareensanayn falka uu ku kacayo iyo waxa ka dhalanaya; iyadoo la dhiirigelinayo jahliga, fasaadka, la macna tirayo diinta iyo ku dhaqankeedka, lana fogaynayo cid kasta oo lagu tuhmayo aqoon, karti, xishood iyo dhaqan wanaagsan.

Bulshada Soomaaliyeed waxay ahayd mid leh isku-duubni, diin, iyo dhaqan mideeyey qarniyo badan oo ay soo jirtay. Hase yeeshee, intii ka dambeysay burburkii dowladdii dhexe 1991-dii, dalku wuxuu galay marxalad adag oo kala go', kalsooni darro, iyo kala fogaansho bulsho abuurtay.

Sida uu sheegay I.M. Lewis (2002), bulshada Soomaaliyeed waxaa ku dhacay "dissolution of the social fabric" — jabkii unugii isku hayay bulshada, kaas oo ahaa qabiilka, diinta iyo caddaaladda. Inkasta oo qabiilku ahaa xoojiye bulsho, haddana wuxuu isu rogay cudur kala qaybiya marka la siiyo awood siyaasadeed oo aan miisaan lahayn.

Maqaalkani wuxuu iftiiminayaa xeeladaha ugu muhiimsan ee lagu burburiyo bulshooyinka, isagoo sharaxaya hababka loo adeegsado, saameyntooda, iyo xalalka suurtagalka ah ee lagu difaaci karo bulshada.

# XEELADAHA LAGU BURBURIYO BULSHOOYINKA

**1. Hurinta Fitnada iyo Khilaafaadka Gudaha**

Mid ka mid ah xeeladaha ugu halista badan waa kicinta khilaafaadka gudaha, ha noqoto mid diimeed, qowmiyadeed, ama qabiil. Tani waxaa lagu fuliyaa abuuridda kala-qaybsanaan iyo nacayb u dhexeeya qaybaha bulshada si dadka looga mashquuliyo arrimaha guud ee mideeya.

Khilaafaadka gudaha waxaa ka dhasha burburka nolosha bulshada oo sababa colaad iyo dagaal. Marka ay bulshadu waydo kaabayaasha asaaska nolosha; sid: shaqooyin, waxbarasho, biyo, caddaalad, iwm, noloshoodu way adkaataa, waxaana sahlanaada abuuridda khilaaf gudeheeda ah.

Warbaahinta iyo aaladaha casriga ah sida baraha bulshada ayaa loo adeegsadaa in lagu kala fogeeyo bulshada, iyadoo lagu faafinayo shaki-abuur, hurin colaadeed, dacaayad, baahin xog aan tafaftirnayn, iskudir, nacayb iyo iska horkeenka kooxaha diineed; halkii laga xoojin lahaa wada-noolaanshaha iyo is-qaadashada bulshada qaybaheeda kala duwan, taasoo sababta colaad iyo kala shaki.

**2. Dhiirrigelitna Fowdada iyo Xasilooni-darrada**

Fowdada iyo xasillooni-darradu waa qaababka ugu habboon ee sahla in bulsho si fudud loo burburiyo; iyadoo la adeegsanayo lana taageerayo kooxo sharci-darro ah ama hubeysan oo ka faa'iideysta kuna dhex dhuunta amni-darrada iyo fowdada la abuuray si ay u helaan dano gaar ah oo ay leeyihiin.

Sidoo kale, waxaa la shaki-geliyaa awoodda ay hay'adaha dowladdu u leeyihiin ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta iyo daboolidda baahiyadooda; taas oo keenta in shacabku ay lumiyaan kalsoonidii ay ku qabeen dowladdooda. Waxaa kale oo fowdada ka qayb qaata suurad-xumaynta qiyamka iyo qawaaniinta nolosha bulshada nidaamisa, loona muujiyo waxaan daruuri ahayn ama wax ku ool ahayn. Waxaana abuurmaya in bulshadu ay gaarto heer aysan waxba ilaalin: shareeco, dastuur iyo dhammaan qawaaninta kale oo dhan.

Soomaaliya marka laga hadlayo, xasillooni-darrada waxaa qayb ka ah: hoggaan xumada, dagaallada qabiilka, fikradaha xagjirka ah; waxaa sidoo kale jira "cid labaad oo kaalin wayn ka gashay burburinta Soomaaliya welina ah sababta ugu weyn ee ka dambaysa burburka tillaabo kasta ee la isku dayo in lagu soo celiyo dowladnimadii Soomaalida; taasoo ah gacanta shisheeye ama faragelinta dibadda".

**3. Burburinta Waxbarashada iyo Dhaqanka**

Waxbarashadu waa laf-dhabarta horumarka bulshada, burburinteeduna waxay bulshada geyayasiisaa dib-u-dhac sanado iyo qarniyaal la socda. Burburinta waxbarashada waxaa loo adeegsada xeelado dhowr ah:

- Daciifinta manhajka iyadoo xoogga la saarayo maaddooyin aan waxba kusoo kordhinayn horumarka bulshada dhinac kastaba, waxaana si ula kac loo burburiyaa maaddooyinka cilmiga ah oo saldhigga u ah horumarka dalka.
- Faafinta fikrado aan cilmi ahayn ama aan dhiirrigelin fikirka naqdiga, hal-abuurka iyo cilmi-baarista ku dhisan.
- Buun-buuninta dhaqammada shisheeye, iyadoo hoos loo dhigayo qiyamka ku qotoma saqaafada iyo cilmiga; lana dhiirigelinayo afkaarta lasoo waarido (dibadda laga keensado) ee lagu daciifinayo haybta waddaninimo.
- Ciriirinta iyo hareeraynta hay'adaha dhaqanka iyo diinta ee ku hawlan wacyigelinta iyo iftiiminta dhaqanka iyo akhlaaqda suubban ee diinta ku salaysan; iyadoo lagu beddalayo kuwo faafiya macno-darrado iyo madadaalo lagu mashquuliyo bulshada.

**4. Burburinta Qoyska iyo Wiiqidda Qiyamka wanaagsan**

Qoysku waa unugga koowaad ee bulshada; beegsigiisuna wuxuu sabab u noqdaa burburka qiyamka bulshada; iyadoo la dhiirrigelinayo fur-furka qoyska, hoosna loo dhigayo qiimaha isku-xirkiisa iyo wadajirkiisa, lana xoojinayo fikradda nolosha keli ahaaneed (individualism). Waxaa kale oo loo sacabba tumayaa dhaqan maaddi ah oo ku qotoma isticmaal xad dhaaf ah oo ku fooggan rabitaan shakhsi ah, halkii la abuuri lahaa dareen kobcinaya masuuliyadda wadareed iyo isu-dhimrinta bulsho.

**5. Marin-habaabinta iyo Faafinta Wararka Beenta ah**

Baraha Bulshada ayaa inta badan loo adeegsadaa si loo faafiyo warar been abuur ah iyo xog khaldan, si jaahwareer loogu rido wacyiga bulshada, aragtiyo bulsho iyo kuwo siyaasadeed oo khaldanna looga dhaadhiciyo; taasoo dadka gaarsiisa xaalad quus ah, islamarkaasna xoojisa macna-darrada, dadkana ku mashquulisa waxyaabo aan qiimo badan lahayn. Marin-habaabintani waxay sidoo kale wiiqdaa kalsoonida dadku ku qabaan hay'adaha rasmiga ah iyo warbaahinta hufan oo gudbisa xogaha lagu kalsoonaan karo.

**6. Dhiirrigelinta Anshax-xumada**

Si loo dhaawaco anshaxa wanaagsan, waxaa la beegsadaa xiriirka qoyska, iyadoo la qiima-tirayo guurka iyo qoyska dabiiciga ee ay bulshadu ku taagan tahay, lana dhiirrigelinayo xiriirka ka baxsan xayndaabka guurka iyo xalaasha Alle banneeyey; taasoo lagu tilmaamayo inay tahay xorriyad shakhsiyadeed. Aragtidaani waxay daciifinaysa in bulshada iyo qoyskuba dhowraan dhaqanka wanaagsan ee diinta ku qotoma, waxayna horseedaysaa dhaqan qalloocan oo ka fog diinta iyo qiyamka islaamiga ah.

## SAAMAYNTA KA DHALATA BURBURINTA BULSHOOYINKA

1. Kala-firdhinta iyo burburka xiriirka bulshada: Khilaafaadka gudaha iyo kala qaybsanaantu waxay wiiqaan kalsoonida iyo isku-duubnida, waxaana samaysanta bulsho kala tagsan oo aan ishaysan.
2. Amni-darro iyo cabsi joogto ah: Burburka bulsho wuxuu sababaa deganaansho la'aan iyo amni xumo keenta barakac iyo hijro joogta ah, iyadoo la baadi-goobayo goob aamin ah oo lagu noolaan karo.
3. Hoos-u-dhac dhaqaale: Fowdada iyo musuqu waxay curyaamiyaan wax-soo-saarka, shaqo abuurka, iyo maalgashiga; taasoo sababta burbur dhaqaale iyo shaqo la'aan.
4. Luminta Haybta Qaran: Marka qiyamka iyo dhaqanka la dayaco, bulshadu waxay lumisaa haybteeda qaran, waxayna si tartiib ah ugu milantaa dhaqamo kale oo dibadda uga yimid.

## SIDA LOOGA HORTAGO XEELADAHA LOO ADEEGSADO BURBURINTA BULSHADA

Bulshooyinka casriga ah waxay wajahayaan xeelado kala duwan oo lagu wiiqayo qiyamkooda iyo xasilloonidooda. Si loo difaaco bulshada, waxaa loo baahanyahay wacyigelin, aqoon, iyo midnimo; iyadoo la qaadayo tallaabooyinka soo socda:

**1. Xoojinta Midnimada Qaran:**

Waxaa lama huraan ah in la abuuro ololeyaal wacyigelin oo lagu xoojinayo ishaysiga bulshada, wada-noolaashaha, aqbalaadda kala duwaanshaha iyo kobcinta waxkasta oo bulshada midnameeda sare u qaadaya.

**2. Kor u Qaadista Waxbarashada iyo Dhaqanka**

Manhajka waxbarashada waa in lagu saleeyaa fikir furan, faham cilmiyeed, iyo dhiirrigelinta aqoonsiga qaran. Waxaa kale oo muhiim ah in la taageero xarumaha dhaqanka iyo madxafyada faafiya qiyamka suuban iyo hal-abuurka.

**3. La Dagaallanka Been Abuurka iyo dacaayadaha**

Waxaa loo baahan yahay sharciyo adag oo xakameeya warbaahinta iyo baraha bulshada, lagulana xisaabtamo jihooyinka iyo shakhsiyaadka faafiya macluumaadka aan raadka lahayn. Sidoo kale, waa in la dhiirrigeliyo warbaahin aragti leh oo sare u qaadda wacyiga bulshada, taasoo shaqadeeda ka salaysa runta iyo qiyamka wanaagsan.

**4. Difaaca Qoyska iyo Akhlaaqda wanaagsan**

Waxaa lagama maarmaan ah in la abuuro barnaamijyo wacyigelin ah oo xoogga saaraya muhiimadda qoyska, doorkiisa tarbiyeynta, iyo qiimaha xiriirka bulshada.

**5. Kor u Qaadista Wacyiga Bulshada**

Waa in la abuuro siminaaro, tababaro iyo dood cilmiyeedyo, si bulshada loogu baraarujiyo xeeladaha lagu burburiyo bulshooyinka iyo sida looga hortago.

Doodahaasi waa in ay dhex maraan jiilasha kala duwan si loo hubiyo in qiyamka iyo aqoontu ay si joogto ah u gudbaan.

## GUNAANAD

Burburinta bulshada ma dhacdo hal mar; waa geeddi-socod dheer oo qorshaysan. Si kastaba ha ahaatee, dhismaha bulsho adag wuxuu ka bilaabmaa wacyi iyo aqoon.

Bulsho kasta oo doonaysa badbaado waa in ay ku dhisnaataa midnimo qaran, waxbarasho tayo leh, iyo qiyam diini ah oo adag.

Mas'uuliyad ayaa saaran qof kasta — waalid, macallin, culimo, iyo hogaamiye — in uu gacan ka geysto dhismaha iyo difaaca bulshada, si loo ilaaliyo jiritaankeeda iyo mustaqbalkeeda.

W/Q: Dr. Maxamed Cali Faarax

## MARAAJIC (TIXRAACYO)


- *Fathi, Madiha Mustafa (2020). Ururada bulshada rayidka iyo xoojinta dareenka dhalinyarada ee qaranimada. Majalladda Jaamacadda Fayuum, Kulliyadda Adeegga Bulshada.*
- *Hadnagy, Christopher (2017). Social Engineering: The Art of Human Hacking. Machadka Maxamed Bin Rashiid ee Aqoon-is-weydaarsiga, Imaaraadka.*
- *Al-Saeedi, Fayez bin Mubarak (2022). Doorka dadka firfircoon ee baraha bulshada ee ka hortagga burburinta qiyamka bulshada ee dhalinyarada. Majalladda Jaamacadda Fayuum, Kulliyadda Adeegga Bulshada.*
- *Marsad Al-azhar (2025), Qorshaha lagu burburiyo bulshooyin: xeeladaha iyo sida looga hortago*
- *I. M. Lewis (2002): Modern History of Somalia*
- *Cabdiraxmaan X. Daa'uud (2010): Dhaliisha Dhaqanka Soomaalida*

# WAQAFKA IYO HORUMARINTA BULSHADA SOOMAALIYEED



Cabdulqaadir Cali Warsame



Xigashada Sawirka: Google

Waqafku waa nidaam uu Islaamku u dejiyay in bulshada Muslimiinta ay isku taakuleeyaan, iyagoo ka helaya horumar adduun iyo ajar aakhiro. Waa nidaam gaar u ah ummadda Muslimka ah, kana mid ah waxyaabaha uu Islaamku dunida kusoo kordhiyay. Hadaba; si aan u fahanno doorka uu waqafku ku leeyahay horumarinta bulshada, waxaa habboon inaan marka hore isweydiinno:Waqafku waa maxay?

## QEEXIDDA WAQAFKA

Waqafku waa nooc ka mid ah sadaqooyinka uu qofka Muslimka ahi Alle ugu dhawaanayo, isagoo hanti u xayiraya dan guud oo waarta. Waxaa loogu yeeraa "Waqaf" sababtoo ah ereyga Carabiga ah ee Al-Waqf wuxuu tilmaamayaa shay la joojiyay asalkiisa oo aan la iibin ama la wareejin karin, balse laga faa'iidaysto wixii kasoo baxa. Mararka qaarkood waxaa lagu magacaabaa Al-Xabsi ama Al-Axbaas, kuwaas oo isla macnahaas wadaaga ama faa'iidaynaya.

Culimadu Fiqiga qaarkood waxay waqafka ku qeexeen: "                    ", taas oo micnaheedu yahay in asalka hantida la joojiyo, faa'iidadeedana loo sii daayo dan guud. Sidaas darteed, waqafku wuxuu ku egyahay hanti muddo dheer jiri karta, sida dhul, beer, guryo, ceelal, iyo dhismayaal kale.

## MAXAA WAQAFKA LOO CUSKADAY?

Waqafka waxaa saldhig u ah daliillo Qur'aan iyo Xadiis labadaba leh. Waxaa ka mid ah aayadda Qur'aanka ee oranaysa: "لن تنالوا البر حتى تنفقوا مما تحبون" (Aal-Cimraan: 92), taas oo micnaheedu yahay: "Samafalka ma gaari doontaan ilaa aad bixisaan waxyaabaha aad jeceshihiin."

Xagga Sunnada, waxaa caan ah xadiiska Imaam Bukhaari ee uu warinaayo Cabdullaahi Ibnu Cumar (RC); Cumar ayaa laga siiyay dhul Khaybar, markaas buu Nabiga NNKH u tagay asagoo kala tashanaya wuxuu kayeeli lahaa, markaasuu yiri: Rasuulkii Allow, waxaan helay dhul Khaybar kuyaalla, waana xoolahayga kan ugu qiimaha badan ee maxaad igula talin lahayd inaan ku sameeyo? Wuxuu ku yiri: hadaad doonto asalkeeda waqaf oo sadaqayso, kana dhig mid aan asalkeeda la iibin, lana iibsanin waxa kasoo baxa, oo aan la hibayn karin lana dhaxli karin, wuxuu yiri Ibnu Cumar: Cumar wuxuu ku sadaqaystay: Fuqarada, Qaraabada, Adoomaha, Musaafiriinta, Martida. Qofka masuulka ka ahna quudkiisa wuu ka cuni karaa, saaxiibkiisna wuu ka quudin karaa, laakiinse waa inaysan xoolo katabcanin".

## DHAQANKA SAXAABADA EE WAQAFKA

Saxaabadii Nebiga (NNKH) waxay waqafka u arkayeen tiir muhiim u ah horumarinta bulshada, sidaas awgeed. Jaabir bin Cabdullaahi (RC) wuxuu sheegay in uusan jirin saxaabi awoodi karay inuu waqaf la baxo oo aan wax waqaf ah bixin. Arrintani waxay muujinaysaa sida ay saxaabadu u fahmeen qiimaha sadaqada waarta iyo doorka ay ku leedahay dhismaha bulshada.

## WAA MAXAY HANTIDA LA WAQFI KARO?

Culimadu waxay isku raaceen in la waqfi karo hanti kasta oo faa'iido waarta leh, asalkeeduna uu sii jiri karo. Waxaa ka mid ah guryo, dhul, xoolo nool, qalab, iyo xitaa hub ama alaab guri. Inkastoo culimada qaar ay ka reebeen waqfinta lacagta iyo raashinka, haddana madaahib kale ayaa oggolaaday haddii lacagtaas la maalgaliyo, faa'iidadeedana loo isticmaalo dan guud.

## SIDA MUSLIMIINTU U DHAQAN GELIYEEN WAQAFKA

Markii ay fidday dowladdii Islaamka, waqafku wuxuu noqday tiir muhiim ah oo lagu dhiso kaabayaal dhaqaale iyo adeegyo bulsho. Waxaana lagu taageeri jiray waxbarashada, caafimaadka, biyaha, cuntada, iyo daryeelka dadka danyarta ah. Sidaas darteed, waqafku wuxuu noqday aalad bulsho lagu hormariyo ka hor inta aysan dowladnimada cusubi si buuxda u qaadan mas'uuliyaddaas. Waana arrin u baahan inaan lagu hallayn iyada keligeed. Maxaa yeelay bulshada Islaamka ah inay horumarka ka shaqayso waa nooc cibaadada kamid ah.

**Awqaafta Cibaadada.**

Waxaa la sameeyay awqaaf gaar u ah Masaajidda, Dugsiyada Qur'aanka, Maktabadaha Cilmiga, iyo dadka u heellan cibaadada ama waxbaridda. Sidoo kale waxaa jiray awqaaf loogu taloggalay martigelinta dadka Xajka ama Cumrada u socda.

**Awqaafta Danaha Bulshada**

Awqaafta noocan ah waxay diiradda saari jireen taageeridda fuqarada, masaakiinta, agoonta, iyo musaafiriinta. Waxaa kale oo waqaf lagu dhisi jiray ceelal, ilo biyo, waddooyin, qubuuro, iyo goobo lagu qubeysto, kuwaas oo dhammaantood ka mid ahaa kaabayaashii nolosha bulshada.

**Awqaafta Caafimaadka**

Waqafka caafimaadku wuxuu door weyn ka qaatay dhismaha isbitaallada, bixinta mushahaarka shaqaalaha, iyo daryeelka bukaannada, gaar ahaan kuwa qaba cudurrada gaarka ah iyo dadka baahiyaha gaarka ah leh sida indhoolayaasha. Waxaa xitaa la shaqaaleysiin jiray dad u gaar ah daryeelka bukaannada rajada laga qabo ay yartahay, si niyaddooda loo dhiso.

## XAALADDA MAANTA IYO BAAHIDA SOO NOOLEYNTA WAQAFKA

Maanta, waqafka waxaa badanaa lagu koobay dhismaha masaajid ama keenista kitaab Qur'aan ah, halka taariikh ahaan uu ahaa nidaam dhammaystiran oo horumarineed. Waxaa loo baahanyahay in dadka hantida leh ay waqaf ka dhigaan qayb ka mid ah xoolahooda inta ay nool yihiin, si ay uga helaan ajar waara.

## WAQAFKA IYO HORUMARINTA CASRIGA AH

Si waqafku u noqdo mid wax ku ool ah maanta, waxaa loo baahanyahay hay'ado maalgeliya hantida waqafka, kana shaqeeya waxbarashada, caafimaadka, beeraha, iyo kalluumaysiga. Lacagaha waqafka ah waa in si xirfad leh loo maalgeliyaa, si wixii kasoo baxa loogu fuliyo adeegyo bulsho oo waara.

## DOORKA DOWLADDA

Si nidaamka waqafka si sax ah loogu shaqeeyo, waxaa lama huraan ah in Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah ay dejistaan xeerar hagaya waqafka iyo hay'adaha samafalka. Xeer la'aantu waxay caqabad ku tahay horumarinta nidaamkan muhiimka ah oo ay ummadu u baahantahay.

## MUHIIMMADA WAQAFKA EE HORUMARINTA BULSHADA

Muhiimmada waqafku waxay ku jirtaa awoodda uu u leeyahay inuu abuuro dhaqaale waara oo jiilal badan sii shaqeeya, maadaama hantida la waqfay aan la iibin karin balse si joogto ah loogu adeegayo danta guud. Wuxuuna si gaar ah u hormariyaa waxbarashada, caafimaadka, biyaha, masaajidda iyo adeegyada kale ee bulshada, isaga oo kaalin muuqata ka qaata buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee bulshada.

Sidoo kale, waqafku wuxuu xoojiyaa isku-duubnida bulshada, kobciyaa isu-gargaarka iyo samafalka, wuxuuna abuuraa shaqooyin maadaama mashaariicdiisu u baahanyihiin maamul iyo shaqaale. Intaa waxaa dheer, wuxuu ilaaliyaa dhaxalka iyo hantida bulshada si ay jiilba jiilka ka dambeeya uga faa'iideystaan, isaga oo kor u qaadaya caddaalad bulsho una fududeynaya dadka danyarta ah helitaanka adeegyo bilaash ah ama jaban. Haddii si hufan loo maamulo, waqafku wuxuu noqon karaa tiir muhiim u ah horumarka waara ee Soomaaliya.

## GUNAANAD

Soomaaliya waa dal hodan ku ah khayraad dabiici ah sida dhul beereed, xoolo, iyo xeebo dhaadheer. Haddii hantidaas loo leexiyo nidaamka waqafka, waxaa suuragal ah in bulshadu ka kaaftoonto gargaar dibadeed iyo gacan hoorsi. Sidaas awgeed, waa inaan dib u soo noolaynaa nidaamka waqafka si aan u gaarno horumar ku dhisan isku-tashi bulsho, sharaf, iyo madax-bannaani dhaqaale.

W/Q: Abdulkadir Ali Warsame

# SOOMAALIYA: XULUFEYSIYO SIYAASADEED! MAXAY DAARANYIHIIN?!



Cabdifataax Nuur Qodax



Xigashada Sawirka: Facebook

Muddo laga joogo shan boqol oo sano ka hor, ayuu (Niccolo Machiavelli 1469- 1527) oo ahaa: diblumaasi iyo siyaasi u dhashsay dalka Talyaaniga qoray, buuggiisi "The Prince" oo uu ku aruuriyay aragtiyadiisii hagardaamooyinka u badnaa!

Machiavelli wuxuu ahaa siyaasi xagasha taban ka dhugta siyaasadda, cilmi-baarayaasha qaar ay ku tilmaamaan siyaasi waaqici ah, aniguse, aan u aqaan ruux samaha liddi-ku-ah, oo aan jeclayn siyaasadda qiimiga iyo mugga ku dhisan.

Waxaa aragtiyadiisa ugu caansan, oraahda ah: (The end justifies the means) oo micnaheedu yahay: ujeedda kasta oo aad leedahay waxaad ku gaari kartaa dhabba kasta oo suuragal ah.

Iminka, waxaa Soomaaliya ka dhashay xulufeysiyo siyaasadeed, ujeedkoodu yahay: inay hantaan kursiga ugu sarreeya ee "Vila Soomaaliya" hilinka qura, ee lagu gaari karaa kursigaasna, wuxuu noqday, in markaan lagu dayo cudud ku dhisan xulufo sal-balaar ah, kala aragti duwan ah!

Waxa keliya ee mideynaya uu yahay: siduu abwaan Mustafe Shiikh Cilmi ku yiri heestii ahayd: (kursigaasaan caashaqayay! madaxweyne, madaxweyne, kol i dhahayee!).

## XULUFEYSIYADA UGU CAANSAN EE SAMEYSMAY!

Soomaaliya markii ay doorashadu soo dhawaato waxaa sameysmi jiray (Madasha Samata bixinta Soomaaliya) ujeedka madashaas ma ahan bad baado oo keliya iyo in loo dhimrinayo qaranka diihaalka siyaasadeed ragaadiyay.

Waxaa ku hoos duuggan "Madasha" in kooxda magacaas la baxdaa ay doonayaan inay kursiga ka tuurtaan madaxweynaha kolkaas kursiga ku fadhiya.

Muddo xileedka madaxweynaha hadda kursiga ku fadhiya Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud isaga oo ay muddo ka harsantahay mudda xileedkiisa dastuuriga ah ayaa abuurmay madal salbalaar ah, markii dambena labo u kala jabtay!

Soo ifbaxa madashaan waxaa ku hoos jiray inta badan jilba-culusta siyaasadda, dhinac markii laga fiiriiyo waxay ahayd fikrad kursi doon ah, ujeedkeedu ahaa: in fool dadajiso lagu dhufto hannaanka doorashada madaxweynaha.

Markii dambe, malahayga, hoggaanka dalka iminka majaraha u haya soo kala dhex-galay, raggii qaar ka mid ahna, ka dhigay gooni-daaq, sameystayna madal kale oo ka aragti duwan tii horay u jirtay.

Waa xulufeysi ugub ah, waxaana keenay baahida siyaasadeed oo is rog rog badan, hoggaanka dalka hayana ku soo waayo arkay madallo uu horay u sameeyay.

Kala jabkii madasha samatabixinta Soomaaliya ka dib, waxaa abuurmay madal kale oo loogu wan-qalay (Golaha Mustaqbalka Soomaaliya) golahaan cusub waxaa xubin ka noqday-siyaasiyiin madax ka ah dowlad-gobolleedyada dalka qaar ka mid ah-madax kale oo kuraasta ugu sarreysa ee dalka soo qabtay.

Waxaa iyana samaysmay madal cusub oo la timi fikir ugub ah, madal kulmisay jilba-culus siyaasadeed, oo sii sheegay ruuxa ay u rabaan inuu dalka hoggaamiyo, waa golaha la baxay: (Midowga Haybad Qaran) oo isu keenay siyaasiyiin xilal ka soo qabtay dalka iyo rag ku caan baxay madaxweyne dhisasho, arrinka ay soo bandhigeenna uu yahay inay Cabdi Faarax Saacid Shirdoon, oo horey u soo noqday raysulwasaare ay ku midoobaan inuu u noqdo musharax madaxweyne.

# MAXAA SOOMAALIYA LA GUDBOON?!

Siyaasaddu kama maaranto is xulufeysi iyo gaashaan-buur ku dhisan aragti siyaasadeed oo samatabixin karta xaaladda dalku ku jiro.

Waxayse taasi u baahantahay hiraal fog iyo aragti siyaasadeed oo bisil, lamana gaari karo ujeedkaas, haddaan la naaxin maanka siyaasadeed.

Soomaaliya iminka waxaa ku gedaamman “Geopolitics” u baahan in lala yimaado wacyi korran oo lagu maarayn karo is-diiddooyinka hardanku ku xeeranyahay, waxaa laga sugayaa siyaasiyiinta raba inay dalka xukumaan waxa afka Ingiriisada lagu yiraahdo “contextual intelligence” oo ah: inay fahmaan waxa ku gedaaman dalka, waxa loo baahanyahay in lala yimaado, sidee looga dabaalan karaa mowjadaha xoogga leh ee badda siyaasadda Soomaaliya?!!.

Gunnaanadkii, waxaa talo ku soo jeedin lahaa in bulshada Soomaaliyeed si fiican loo wacyigeliyo dhabbada dimuquraadiyaddana la qaado, xulufaysiyada jirana ay la yimaadaan qorshe mug weyn oo dalka lagu badbaadin karo.

W/Q: Cabdifataax Nuur Qodax

























**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA MARAG